

Somali PHAST

Step-by-Step Guide

Talaabooyinka Waxcaqabadka Isku Xig Xiga



Caafimaadkaagu gacmahaaga
ayuu ku jiraa



Somali PHAST Step-by-Step Guide

Waxaa laga soo xigtey qormadan buugga asalka ah

PHAST Step-by-Step Guide: A Participatory Approach for the Control of Diarrhoeal Disease
(Talaabooyinka xidhiidhka ah ee loo maraayo: Si wada jir ah uga wada qayb qaadashada bulshada ee isbedelada ku aadan hagaajinta fayodhawrka iyo nadaafadda guud oo loo soo gaabiyo) oo ay qoreen Wood S., Sawyer R., Simpson-Hébert M., World Health Organisation, Geneva, WHO/EOS/98.3

Mahadcelin

Waxaa uu ku qaabaysan yahay barnaamijka PHAST ee tilmaamaha isku xigxiga leh ee hay'adda caafimaadka adduunka WHO kaasi oo ku haboonaaday deegaamada Soomaalida. Buugan tilmaamaha ah soo bixitaankiisa muuqaalkiisan hadda waxaa asal u ahaa dedaalkii iyo taageeradii ay ka geysteen hay'adaha: Caritas Switzerland/Luxembourg (oo si wadajir ugu wada hawl gala magaca SwissGroup), Oxfam GB, COOPI, European Union, UNICEF, Save the Children UK, CEFA Somalia European Committee for Agricultural Training, Danish Refugee Council, German Red Cross/ Somali Red Crescent Society, Action Contre la Faim, Concern Worldwide, Jacaranda Designs, Kenya Red Cross Society, and TACITUS iyo ururro iyo shaqsiyaad kale. Mahad gaar ah waxaa iskaleh xarunta biyaha iyo nadaafada caalimiga ee IRC International Water & Sanitation Centre dib u eegista farsamo ee ay ka gaysteen mashruucan.

Waxii faah faahin dheeraad ah fadlan la xidhiidh swissgroup@caritas-switzerland.org

Tusmo

Mahadcelin..... ii

Tusmo..... iii

QAYBTA 1 - HORDHACA PHAST

Qaybta 1: Hordhaca PHAST..... 2

1.1. Ujeeddada tilmaamahan..... 2

1.2. Sida loo isticmaalaayo tilmaamaha..... 3

1.3. Si aad ugu noqonkarto fududeeye..... 5

QAYBTA 2 - FIKRADAHA AASAASIGA AH

Qaybta 2 – Fikradaha aasaasiga ah 10

2.1. Nadaafada 10

2.2. Fayodhawrka 10

2.3. Xidhiidhka ka dhexeeya nadaafadda iyo fayodhawrka 11

2.4. Horumarinta nadaafadda iyo fayodhawrka Waa wax ka badan
in dadka loo sheego inay isbedel sameeyaan..... 11

2.5. Faahfaahinta 5 shanta qaybood ee nadaafadda 13

QAYBTA 3 - TALAABOYINKA ISKU XIGXIGA EE PHAST

Qaybta 3 -Talaabooyinka isku xigxiga ee PHAST 20

TALAABADA 1AAD: Kaqaybqaadashada bulshada (*Community Entry*) 20

TALAABADA 2AAD : Dhibaataada oo la garto (*Problem Identification*) 23

TALAABADA 3AAD: Lafagurka dhibaatooyinka (*Problem Analysis*)..... 25

TALAABADA 4AAD: Aqoonsiga xalka (*Identification of Solutions*)..... 36

TALAABADA 5AAD: Qorshaynta meelmarinta iyo isbadalada
(*Planning for Implementation and Change*)..... 50

TALAABADA 6AAD: Meelmarka iyo idho indhaynta horumarka
(*Monitoring Implemenation Progress*) 63

TALAABADA 7AAD: Qiimaynta (*Evaluation*) 66

Gaba gabada..... 76

Lifaaqqa: Shubanka iyo xanuunada kale ee nadaafadda guud la xidhiidha..... 77

QAYBTA 1 - HORDHACA PHAST



Produced by Caritas Switzerland/Luxembourg, COOP, Oxfam GB and BCF UK



Produced by Caritas Switzerland/Luxembourg, COOP, Oxfam GB and BCF UK



Produced by Caritas Switzerland/Luxembourg, COOP, Oxfam GB and BCF UK

Qaybta 1: Hordhaca PHAST

1.1. Ujeeddada tilmaamahan

Habka sida wada jirka ah looga wada qayb qaadanaayo ee lagu hagaajinaayo fayodhawrka, nadaafadda guud oo loo yaqaano marka la soo gaabiyo (PHAST) waxa uu ka caawinayaa dadka inay dareemaan kalsoonida naftooda iyo awoodda wax qabad ee ay u leeyihiin si ay u horemariyaan bulshadooda. Dareenka awoodda wax qabad iyo kor u qaadka awoodda dadka waxa ay muhiim u yihiin is bedel dhab ahaaneed sida nadaafadda deegaanka iyo dhismaha musqulaha.

Habkan PHAST ee sida wadajirka ah fayadhawrka iyo nadaafadda guud wax looga wada qabanayaa waxa uu ku salaysan yahay in laga wada qaybgalo iyadoo kawada qaybgalka bulshada uu ku hogaaminaayo barnaamijayada bulshadu ku jihaysan tahay ay ka guulo badan yahiiin kuwa hababka loo xalinayaa ka hor imanayaan bulshooyinka.

Guud ahaan, ku dhaqanka hababka laga wada qayb gelaayo ee biyaha, fayadhawrka iyo nadaafadda guud isbadalkaas si loo gaadhaa waa hawl dheer oo muddo soconaysa mase aha wax mar keliya dhacaaya. Ku dhaqanka hababkaasi waxa ay u bahan tahay in muddo wacyi gelin la sameeyo, awoodda wax qabad ee dadka kor loo qaado, iyadoo laga soo bilaabay wada hadal iyo is faham ilaa kawada qaybgalka hawsha la wada qabanaayo, taasi oo markasta dib loo egaayo dariiqooyinka iyo qalabka ama agabka la adeegsanaayo, lana dabagelaayo ka dib tababarada lagu dhisaayo kalsoonida dadka ka qayb gelaaya hawsha.

Buugan tilmaamaha ah waxaa loo qaabeeyay inay adeegsadaan hawlfududeeyayaasha iyo kuwa horumarinta bulshada ka shaqeeya iyadoo looga jeedo ama loo sii maraayo si hab dhaqanka bulshada ee fayodhawrka wax looga bedelo.

Buugan tilmaamaha ah waxaa kale oo loo qaabayey in ay adeegsadaan dadka loo tababaray habaynta, iyo shaqaalaha bulshada. Si ay udhowraan fayodhawrka, isbadalka habdhaqanka nadaafadeed ee mujtamaca guud.

Kaso qeyb ka ah barnaamijka ama mashruuca balaaran ee nadaafada iyo biyaha. Buugan hagaha ah, kaliya waxaa isticmaali kara dadka loo tababaray howsha faya dhowrka ee mashruuca PHAST.

Si gaar ahaaneed waxa uu buugan tilmaamaha ahi uu bixinayaa :

- Xariiqo wax ka bedel oo dhinaca hab dhaqanka fayadhawrka ah.
- Habka si wada jir ah uga wada qaybgalka si loo xoojiyo awoodda wax qabad ee bulshada si loo cidhibtiro xanuunada biyaha iyo nadaafadda guud la xidhiidha.
- Habab ku hogaamiya bulshada inay si wanaagsan uga faa'iidaystaan adeegyada iyo agabka dhinaca nadaafadda guud iyo biyaha ah ee ay haystaan.
- Aqoon iyo xirfad barasho si wada jir ah ka wada qaybgalka bulshada ee qalabka loo adeegsado waxbarashada ku saabsan fayadhawrka guud.
- Aqoon iyo xirfad barasho ku saabsan habka qiimaynta ee sida wadajirka ah ugu samaynayaan isbedelka dhinaca hab dhaqanka bulshada ee fayadhawrka iyo hagaajinta biyaha.

Barnaamijkan sida wada jirka ah looga wada qayb qaadanaayo ee lagu hagaajinaayo fayodhawrka iyo nadaafadda guud (PHAST) waxa laga rajaynayaa inuu ka caawiyo bulshada arimaha soo socda:

- Inay horumar dhinaca fayadhawrka ah ku sameeyaan hab dhaqankooda bulsho ahaaneed.
- In laga hortago xanuunada shubanka keena.
- In bulshada lagu dhiiri geliyo maamulka iyo isticmaalka wanaagsan ee agabka ama adeegyada biyaha iyo nadaafadda guud ee ay haystaan.

Barnaamijkan PHAST waxa uu ku gaadhayaa higsiga ama yoolkaas kor ku xusn ee uu

leeyahay iyadoo loo maraayo hababka si wadajir ah uga wada qaybgalka ee bulshada kuwaasi oo:

- Soo Bandhigaya xidhiidhka ka dhexeeya faya dhawrka, nadaafada iyo xaaladda caafimaadka.
- Sare u qaadiya kalsoonida naf ahaaneed ee xubnaha bulshada.
- Awoodh u siinaaya bulshada inay qorshaystaan horumarinta ama hagaajinta deegaanka ay ku nool yihiin iyo inay yeeshaan kuna shaqeeyaan agab dhinaca biyaha iyo nadaafadda ah.

1.2. Sida loo isticmaalaayo tilmaamaha

Buugan waxa uu ka kooban yahay todobo (7) talaabo. Shanta hore waxa ay tahay in bulshadu ay fahanto tub hormarsan oo qorshaynaya habka looga hortago cudurada shuban biyoodka iyadoo sare loogu qaadayo biyo ku filan, habdhaqanka faya dhowrka iyo nadaafada. Talaabooyinka lixaad (6) iyo todobaad (7) waxay ku lug leeyihiin la socodka iyo qiimaynta mashruuca si aad u habsato in qorshahaani uu si guul leh u dhaqan galay ama waxtar u yeeshay. Talaabo kastaa waxa ay ka koobantahay inta u dhaxaysa hal (1) ilaa Lix (6) shaqo, habka iyo sida loo qabanayo shaqo kastaa waxaad ka heli doontaa waxyaabaha soo socda.

- Ujeededa
- Waqtiga
- Alaabta
- Hawusha laqabanayo
- Fiiro gaar ah

Inta badan shaqooyinkani waxaa looga baahanyahay adeegsiga sawiro si ay u caawiyaan howlaha ka dhadhicinta. Qoraalkan waxaa wehliya canjalad (CDROM) ah oo ay ku jiraan sawiro muujinaya waxyaabaha ay adeegsadaan dadka somalida ee ku tacaluqa mid walba oo howshan ka mida.

Isbadalka nadaafada iyo faya-dhowr-ka ku qaabaysan ka qaybgalka ee mashruuca

– PHAST (Participatory Hygiene and Sanitation Transformation) waxaa tub ama hab isku xirriira. Waxa ay qaadanaysaa waqti in dadka aad ku wada howliso talaabooyinka oo dhan iyo shaqooyinka, waa macquul in aad ku caawiso iyaga in aad fahansiiso, ku noolaanshaha faya dhowr liita, iyo habdhaqanka nadaafadeed in ay tahay asbaabta ugu wayn in dadku ay ku dhacaan cuduro badan oo laga hor tagi karo, gaar ahaan cudurka shuban biyoodka kaasoo caan ku ah mujtamacyo badan isla markaana dad badan ay u dhintaan sanad walba haba u badnaadeen caruurta.

Diyar garow Ka hor inta aadan bilaabin

Akhri dhamaan buugan tilmaamaha ah adigoo hubinaaya inaad fahamtay, si aad ula qabsato qalabka ama farsamada loo adeegsanaayo hababka sida wada jirka ah looga wada qayb gelaayo ee lagu hagaajinaayo fayadhawrka iyo nadaafadda guud ee Somaliga ah, agabka iyo tilmaamaha ku jiraba si aad u la jaanqaadid (PHAST Somali toolkit). Soo ururi dhamaan waraaqaha, qalimaanta, qoryaha, maqasyo imw ee aad u baahan tahay ka hor inta aadan bilaabin.

Samee oo ku celceli hawlaha ilaa aad si fudud u samayn kartid.

Dooro kooxda

Kani waa in uu ahaado koox yar oo 15 ilaa 40 qof ka kooban kuwaasi oo doonaya inay horumariyaan bulshadooda. Adiga ayaa iska leh go'aanka aad ku dooranayso xubnaha kooxda kuugu jiraaya. Kooxahaas waxaa ka mid ahaan kara: guddiyada waxbarashada ee bulshada, dad metelaaya waalidiinta, macalimiinta dugsiyada, gudiga biyaha, gudida odayaasha iyo hogaamiyayaasha kale ee bulshada. Iska hubi in ay si siman ugu jiraan dadka metelaaya haweenka iyo dhalinayarada si aad u xaqiijiso in qayb kasta oo bulshada ka mid ah aragtidoodii si sax ah loo metelaayo.

Hawlaha qaar ayaa u baahan kara inaad u sii kala qaybiso koodii kooxo yar yar oo 5 qof ama 8 qof ka kooban. Si kawada qaybgalku u fiicnaado. Waxa aad u kala bedeli kartaa

Toddobada talaabo ee qorhsaha bulshada si ay uga hortagaan xanuunka shubanka

Tallaabada	Hawsha la qabanaayo	Agabka la adeegsanaayo
1. KAQAYBQAADA-SHADA BULSHADA (Community Entry)	1. Kaqybqaadshada bulshada	1. Talawga wabiga
2. DHIBAATADA OO LA GARTO (Problem Identification)	1. Dhibaatoyinka caafimad ee bulshadana	1. Jadwalka taariikh xilliyeedka
3. LAFAGURKA DHIBAATOYINKA (Problem Analysis)	1. Qiimaynta ama khariidadda biyaha iyo nadaafadda guud ee bulshada 2. Hab dhaqanka wanaagsan iyo kuwa xun xun ee ku saabsan nadaafada guud 3. Baadhitaanka sida bulshadu u dhaqanto 4. Sida xanuunku u faafo	1. Daraasadda baahiyaha bulshada. 2. Kooxaynta iyo kala saaridda noocyada saddex qayboodka ah. 3. Tuse jeebadeed. 4. Dariiqyada xanuun gudbinta
4. AQOONSIGA XALKA (Identification of Solutions)	1. Joojinta fiditaanka xanuunka 2. Xulashada waxyaalaha caqabadaha ah 3. Xulashada hormarinta biyaha 4. Xulashada hagaajinata nadaafadda guud 5. Xulashada hagaajinta hab dhaqanka fayadhawrka qof ahaaneed, gudaha xaafadda iyo deegaanka guud ahaan 6. Waqti la isku waydiiyo suaalaha	1. Xidhitaanka dariiqyada 2. Qaabaynta caqabadaha jira 3. Sheekada ku saabsan faraqa 4. Salaanka nadaafadda guud 5. Kala saarista iyo kooxaynta 6. Tusaha su' aalaha
5. QORHSYNTA MEELMARINTA IYO ISBADALADA (Planning for Implementation & Change)	1. Hawlaha cayiman ee ay kala qabanayaan raga iyo dumarka bulshadu 2. Xulashada cida ka faa'idey 3. Qorshaynta hormarinta bulshada 4. In la ogaado wixii qaladaad ah ee dhici kara	1. Daraasad doorka iyo kala lahaanshaha hawlaha ee lab iyo dhedig 2. Heerarka darajo ee hantiyeed 3. Qorshaynta qoraalada wacyigelinta 4. Tusaha dhibaata
6. MEELMARKA IYO INDHO INDHAYNTA HORUMARKA (Monitoring Implementation Progress)	1. Isu diyaarin si loo xaqiijiyo wixii horumar ah ee la sameeyay	1. Qorshe hawleedka hubinta hawlaha
7. QIIMAYNTA (Evaluation)	1. Qiimaynta ka qayb galka	1. Fursado agabyo kala duwan oo la adeegsan karo

kooxaha kala duwan ee ka qaybgalayaasha ah hawlaha kala duwan. Koox yare kastaa waxa ay ka siin karaan kooxda oo dhan war bixin natiijada ay gaadheen marka ay hawl kastaa ay dhamaadka tahay, ama hal koox (markiiba mid) ayaa la waydiisan karaa inay ka war bixiyaan kooxda inta kalana waxa ay ku biirin karaan fikrado ama talooyin dheeraad ah.

Tallaabooyinka

Tallaabooyinkan waa in loo raaco mid mid sida ay u kala horeeyaan Iyadoo ay tallaabo kastaa taageerayso middii ka horaysay. Sidoo kale dareen wanaagsan oo is bedelka aqbali kara ayaa loo baahan yahay, sida aanay bulshona ula mid ahayn bulsho kale. Xataa bulsho kaliya dhexdeed ayaa noqon kartaa mid ka soo jeedda asal ahaan meelo kala duwan, inta badan waxa ay bulshooyinku ka koobmaan koox hoosaadyo kala duwan iyo qabaail, markaas habka uu mid kood gooni u soo samaystaa waxa uu aad uga duwanaan karaa kan kale.

Waxa ay qaadan kartaa min 2 bilood ilaa 6 bilood inta uu soconayo dhamaystirka habka hal koox. Waa inaad xasuusnaataa marka aad talaabo uga gudbayso talaabada kale ee ku xigta waa inay ahaato marka ay kooxdu muuqato inay diyaar u tahay, adiga ayaa go'aansanaaya mudada ay soconayso hawl kastaaba marka loo eego xaaladda jirta sida helitaanka niyadda kooxda. *Ha u sheegin kooxnaba mudada ay ku tahay inay ku qaadatao dhamaystirka hawsha, waa in aanay jirin waqti cayiman ama jawaab go'an oo hawlaha barnaamijka PHAST ah.*

Diiwaan gelinta natiijada hawlaha

Kooxda ayaa samaysanaysa diiwaan gelinta natiijada hawlaha iyo go; aanada talaabo kasta oo ay qaadayaan, inta badan kuwaasi waa natiijada hawlaha ay qabteen, waxaa lagu soo bandhigi karaa gidaarka meel ay dadka oo dhami ay iska wada arki karaan, qaabka ama habka wax loo diiwaan gelinayaa waxa ay ku xidhan tahay waxyaalo kale sida heerka wax qorista iyo wax akhriska ee bulshada, diiwaan gelinta waxaa looga jeedaa inay koodu dib u eegi karaan horumarkooda ay sameeyeen.

Fikradaha qaar waxaa loo baahan yahay inay qornaadaan marka la soo bandhigaayo (iyadoo ku xidhan heerka wax qorista iyo akhriska ee kooxda, waxaa kale oo aad dooran kartaa inaad adeegsato sawirro halkii qoraalka) waydii kooxda inay doortaan mutadawac ama doortaan qof si wanaagsan u qaban Kara hawsha.

Hubi in diiwaan gelintii hawlihii hore la keenay kulan kasta, haddii kooxdu u muuqato inay ku mashquuleen ama ay ku adkaato inay wax isku raacaan waxa laga yaabaa inay dib u eegis natiijadii ama go'aanadii shirarkii hore ay caawiso.

Qiime mid kasta oo ka mid ah hawlaha

Jawaab celinta xidhiidhka ka dhexeeya hawlaha, sida kooxdu u fekarayso xun ama wanaagsan, iyo meelaha layara toosin karo ee horumar lagu samayn karaayo waa muhiim dhamaan, markaas hawl kastaa waa in la qiimeeyaa natiijada dhamaadkeeda marar kale, hadii ay suurto gal tahayna ka hor intaan hawsha taa ku xigta la bilaabin.

1.3. Si aad ugu noqonkarto fududeeye

Waxaa aad u muhiim ah in Qofka fududeeyaha ahi uu xusuus naado inaanu macalin ahayn! Kaalintiisu ay tahay fududeeye ama gogol xaadhe. Adoo isticmaalaya hawlaha tilmaamaha ku qoran, waa inaad ka caawiso kooxaha ka qaybgalayaashu u qaybsan yihiin:

- Inay gartaan waxyaalaha muhiimka u ah iyaga.
- Sheegista iyo daraasad ku samaynta mushkiladahooda.
- Garashada xalka suurto galka ah.
- Doorashada fursadaha ugu haboon.
- Samaynta qorshe la fuliyo si xalka loo gaadho.
- Kormeer dabagal iyo qiimaynta natiijada wax qabadka la xidhiidha waxyaalihii la qorsheeyay.

Markaa waa in aanad jhaynin kooxda, sii warbixin halkii aad kooxda u dhaafi lahayd

Inay iyagu keenaan oo helaan, soo jeedi oo kula tali waxa ay tahay inay qabtaan, qaado qiyaaso ku dhaw jawaabta saxa ah ee hawsha ama ku sax kooxda. Waxa keliya ee ka reeban tani waa haddii ay kooxdu ku waydiiso warbixin farsamo ahaaneed. *Doorakaagu waa inaad ka caawiso kooxda inay si fiican u fahmaan xaaladooda oo ay qaataan go'aano xog ogaalnimo ku dheehantahay oo ku saabsan sidii xaalad ka fiican oo xalisa dhibta loo heli lahaa.*

Hawlaha buugan tilmaamaha ah waxaa loo sameeyay si ay ka qayb qaadashada mid kasta oo ka mid ah xubnuhu ay si tixgelin leh muhiimad u leedahay si siman. Haddii hal qof uu maroorsanaayo kelidii sida ay hawluhu u socdaan waa inaad ogaataa in qofkaas laga dhigtay hogaamiyaha kooxda ama inuu si tartan shakhsinimo ah uu kelidii iska wato hawshii iyadoo ay ka maqan tahay taageeradii kooxda inteeda kale. Qofka tartanka jecel ama cadhada badan ee kelidii tiisa uun haystaa waa inaad dhinac ula yara baxdaa oo aad ku qancisaa in koox ahaan kuwada shaqayntu hawlaha marka la socodsiinaayo ay muhiim u tahay ama wax kale oo gooni ah ayaad u diri kartaa inay sameeyaan oo ka dhigtid mashquul si kooxdii ay hawshii u sii wataan. Haddii qofka noocaas ahi uu ahaado mid ka mid ah hogaamiyayaasha bulshada, ula xidhiidh si yara qiimayn leh gooni ula hadal bilawga hawshaba oo isku day inaad ka hesho taageeradooda ay ka gaysan karaan hawshaas. Marka aad tahay fududeeye waa in aanad isku sheegin naftaada in aad hogaamiyihii kooxda adigu aad tahay ee waa inaad la siman tahay, xirfadda dhagaysiga wanaagsani waa mid iyana muhiim ah, hawlaha barnaamijak PHAST waa kuwo aan dhamaad lahayn mana jiraan wax firkaad ah oo qalad ama sax ahi.

Waxa aad u baahan tahay in la helo jawi degan inta aad ku jirto nidaamka qorshaynta hawlaha. Heesaha iyo ciyaaraha dhaqanka ayaa loo adeegsan karaa furfurnaanta qaybaha hawsha iyo farxadda ka qayb galayaasha.

Tilmaamaha guud

- In dhamaan alaabta loo baahan karo oo dhami ay diyaar tahay ka hor intaan la bilaabin.
- Hubi in alaabtaada, sida sawirada la soo daabacay ay yihiin kuwo muuqaal waawayn si ay u wada arkaan dhamaan ka soo qaybgalayaasha.
- Isku day inaad xadayso tirada kooxda in aanay ka badanin 40 qof.
- Hubi in dadka midba kan kale uu si sahlan ula hadli karo, ka dhig fadhiga mid wareeg ah haddii ay suurto gal tahay.
- Ku bilaw qayb kastaa diirin ama firfircoon gelin sida hees oo kale.
- Ku soco adigoo mid mid u qaadanaaya hawlaha markii kasta raacayana tilmaamaha buugan ku jira.
- Waa inay ku hagaan baahiyaha kooxdu ee aanad muhiimad siinin wakhtiga loo cayimay. Waqtiga loogu talagalay waa mid layska qiyaasay ee waa inaanu ku dedejin.
- Marka koox la siiyo hawsha ay qabanayaan adeegso kelimaadka tooska ah ee aad ku sheegi kartid ujeeddada.
- Dhiirigeli soona dhawee soo jeedinta ama wax ku darsiga dadku ay sameeyaan, xasuusnaw ma jiraan jawaabo qalad ahi.
- U fududee kooxda ha ku hagin oo ha u leexin.
- Isku day inaad dhiirigeliso sida fiican uga qayb qaadashada mid kasta oo ka mid ah ka qaybgalayaasha. Ka taxadir inaad qaladaadka sheegto ama aad diidis ku samayso wax ku darsiga soo jeedimaha.
- Maskaxda ku hay heerka wax qorista iyo akhriska ee ka qaybgalayaasha, isku day inaad hesho habab ay ku heli karaan ay ku haysan karaan waxyaalaha laga dooday ama la isku raacay.
- Ka qaybgalayaashu ma ku haystaan alaabada meel badbaadinaysa oo amaan ah.

- Dhamaadka hawsha, waydii xubnaha koox kasta inay qiimeeyaan hawl kasta iyadoo loo eegaayo wax ay barten, wixii ay jeclaayeen iyo wixii aanay jeclayn.
- Dhamaadka qaybta ee hawsha ugu hambalyee xubnaha kooxda dedaalka iyo hawsha ay qabteen una sharax si kooban wixii la qabtay iyo waxa qaybta kale ee ku xigtaa ay ku saabsan tahay.
- Bilawga kulan kastaa oo kooxdu ay yeelato, waydii kooxda in ay dib u eegid ku sameeyaan wixii la soo qabtay ilaa hadda iyo go'aamada la gaadhay.
- Qorhsee inaad alaabta u dhamayso ama aad u kaydiso si mustaqbalka loo isticmaali karo.

QAYBTA 2 - FIKRADAHA AASAASIGA AH



Produced by Caritas Switzerland/Luxembourg, COOP, Oxfam GB and BCF UK



Produced by Caritas Switzerland/Luxembourg, COOP, Oxfam GB and BCF UK



Produced by Caritas Switzerland/Luxembourg, COOP, Oxfam GB and BCF UK

Qaybta 2 – Fikradaha aasaasiga ah

2.1. Nadaafada

Kelmadda ‘Nadaafad’ waxa ay tilmaantaa xaaladda nadaafadda ee heerarka kala duwn, waxaa kale oo lagu qeexi karaa hab dhaqanka iyo sida ay wax u sameeyaan bulshooyinku marka laga eego dhinaca nadaafadda, taasi oo raadku yeelan karta caafimaadkooda iyo ka dadka kaleba. (Tusaale ahaan qoyskooda ama bulshadooda dhexdooda) raadkaasi oo mid wanaagsan iyo mid xunba yeelan kara. Hab Dhaqanka fayodhowrka wanaagsani iyo sida ay u isticmaalaan bulsho kastaa waxaa uu horumarinayaa caafimaadka wanaagsan, gaar ahaan ka hortagga xanuunada shubanka keena, halka ay nadaafad darrada ama hab dhaqanka xunxun ay dadka ku keenaan xanuunada shubanka, caafimaad darro iyo xataa dhimasho gaar ahaan caruurta kuwa markaas dhashay iyo kuwa yaryar. Hab dhaqanka nadaafada waxaa loo kala qaybin karaa shan (5) qaybood:

1. Nadaafada qofka
2. Si hagaagsan oo la isaga fogeeyo saxarada dadka
3. Nadaafada deegaanka iyo ka guriga
4. Nadaafada biyaha
5. Nadaafada cuntada

Ilaalinta nadaafadda ee heer kasta iyo hubinta in si fiican la isaga fogeeyo saxarada dadka sida saxarada caruurta waxa ay dhab ahaantii yaraynaysaa oo ay ka hortag u noqonaysaa in la qaado xanuunada shubanka keena, dhinaca kale nadaafada liitaa waxa ay keenaysaa in xanuunada shubanka keena la qaado.

Horumarinta nadaafadu waxa ay xidhiidh la leedahay ama kuba xidhan tahay in hab dhaqanka nadaafada ilaalinaaya la horumariyo, kaasi oo si balaadhan ugu xidhan nolol maalmeedka caadiga ah sida biyo helista, kaydinta iyo isticmaalkooda, gacmo maydhista iyo helitaanka iyo isticmaalka adeegga caafimaadka. Hawlaha nolol maalmeedka caadiga ahi waa wax inta badan iska joogto ah oo aanay sahlanaayn in si fudud loo bedelaa.

Hadaba maxaa dadka ku caawinaaya in nolol maalmeedkooda caadiga ay yareeyaan khatarta ka iman karta caafimaad ahaan biyaha iyo nadaafad darada guud? Baahida loo qabo in nadaafada la hagaajiyaa waxa ay si toos ah ugu xidhmaysaa ujeeddooyinka habka biyo qaybinta iyo mashaariicda fayodhowrka oo caawinaaya ka hortagga xanuunada biyaha iyo fayodhowrka ka yimaadda iyo isla markaas in mashaariicdaasi ay caawinayaan hagaajinta xaaladaha nololsha.

2.2. Fayodhowrka

Fayodhowrku waa qaybta muuqata waxaana looga jeedaa adeegyada deegaanka ka dhigaaya mid nadiif ah, kana ilaalinaaya dikhawga ama wasakhawga, waxyaalaha keena ama wasakheeya ee xumeeya deegaanka waxaa ka mid ah saxarada dadka ee lagu tuuro meelaha banaanka ah, gaar ahaan meelaha biyaha u dhaw, qashinka guryaha sida hadhaaga cuntada, digadda ama saalada xawayaanka oo banaanka loo dhaafo halkii ay ahayd in la gubo ama meel sax ah lagu daadiyo. Si ay dadku ugu dhaqmaan habka fayodhowrka ee hagaagsan waa inuu jiraa oo ay heli karaan adeegga nadaafadda guud ee ku haboon, sida suuliyo ama adeeg qashin qub haboon oo dadku ay haystaan isticmaalina karaan.

Haddii deegaanka aan laga dhigin mid nadiif ah ama laga ilaalinin waxyaalaha xumaynaaya iyo wasakhawga waxa ay khatar ku noqon kartaa caafimaadka guud ee dadka iyadoo ay dhici karto in waxyaalaha sumaysan ee wasakhawgaa deeganka ka dhashay ay u gudbaan ama ay galaan jidhka dadka, inta badan waxa ay ka gali karaan qofka afka waxaanay keeni kartaa xanuun daran ama xataa dhimasho gaar ahaan caruurta. Wasakhaynta deegaanka waxa ay saamayn kartaa heerarka kala duwan ee guryaha ilaa bulshada, waxyaalaha deegaanka wasakheeya ka ugu khatarsani waa saxarada dadka oo ay ta caruurta yaryari ka mid tahay, sidaa daraadeed waa cadawga koowaad 1 ee ay tahay in lala

dagaallamo marka lagu jiro hab dhaqanka hagaajinta nadaafadda iyo fayodhowrka

Horumarinta nadaafadda iyo fayodhawlku waxa ay macnaheedu yahay marka la isku wada keeno ama isku darka xidhiidhada iyo dariiqyada qaybaha nadaafadda iyo addeegga wax qabad oo la hagaajiyo, hadii mid ka mid ah la waayo ka kalana laguma guulaysan karo, sidaa darted agabka iyo addeegga fayadhawlku waa in la hagaajiyaa hadii la doonaayo in nadaafadda iyo fayodhawlku hirgalaan.

2.3. Xidhiidhka ka dhexeeya nadaafadda iyo fayodhawlku

Nadaafadda iyo fayodhawlku waa sida labada dhinac ee shillinka (lacagta birta ah dur iyo daabac). Dhinac waa hab dhaqankeenna nadaafadda iyo xidhiidhka ay la leedahay shantii 5 qaybood ee nadaafadda, dhinaca kalana waa waxyaalaha muuqda ee addeegga ama agab ahaan qalabka inaga caawinaaya ku dhaqanka hab dhaqan fay dhawr leh iyo wax ka qabashada fayadhawlku. Sababahaas dartood waxaa muhiim ahaan aragti guud ah in aan xusno in ay wax barashada nadaafadda ay tahay adeegsiga (software) halka ay adeegyada ama agabka iyo qalabka wax ka qabashada uu u yahay qaybaha dhismaha ee aasaasiga (hardware) u ah waxbarashada iyo horumarinta nadaafadda iyo fayodhawlku. Nadaafadda iyo fayodhawlku midba waxa uu ku xidhan yahay midka kale, midna ma jiri karo kan kale la'aantiis. Hadaba si labaduba uga gaystaan taageero waxtar dhab ah leh horumarinta caafimaadka wanaagsan, biyahu waxa ay ka ciyaarayaan door wayn waxaana looga baahan yahay hab dhaqan ku salaysan nadaafadda iyo fayodhawlku.

2.4. Horumarinta nadaafadda iyo fayodhawlku. Waa wax ka badan in dadka loo sheego inay isbedel sameeyaan

Barnaamijka hor u marinta nadaafadda ee qiimaha lahi waa in uu hubiyaa in:

- Bulshadu fahanto in fiditaanka xanuunada qarkood ay xidhiidhka la leeyahiin fayadhawlku iyo isticmaalka biyaha.

- Bulshadu ogaata in inta badan xanuunada biyaha iyo fayadhawlku la xidhiidha lagaga hor tegi karo wax qabad ama talaabooyin sahlan (oo si shaqsi ama bulsho ahaanloo qaban karo).
- Shaqsiyaadka iyo bulshooyinka lagu dhiiri galiyo inay hor u mariyaan ama ay bedelaan hab dhaqanka lagama maarmaanka u ah horumarinta caafimaadka.
- Shaqsiyaadka iyo bulshooyinku hagaajiyaan sida ay u maamulayaan adeegyada xagga biyaha iyo fayadhawlku ee ay haystaan.
- Shaqsiyaadka iyo/ama bulshooyinka oo samaysta qaabab wax qabad oo muuqanaaya kuwaasi oo looga baahan yahay ama lagama maarmaanka u ah horumarinta adeegsiga biyaha iyo meelaha saxarada dadka lagu daadiyo.

Waxa aynu waayo aragnimada ku ogaanay in biyaha nadiifta ahi ay ugu yaraan keenayaan in yar oo horumar xagga caafimaadka ah. Hab dhaqanka nadaafadda ku salaysani waa inuu sidaa darteed ahaado mid sidiisa gaarka ah loogu aqoonasado inuu xuquuqdiisa u leeyahay, taasi oo hab ku haboon nadaafadda guud iyo biyo nadiifta ah waa tiirarka caawinaaya. Iyadoo mid kasta oo ka mid ah 3 da qaybood uu leeyahay faa'iido ama taageero caafimaad dhab ahaanse waa isku darka saamayntooda ama raadkooda ay yeeshaan waxa isbedel dhab ah samayn kara mudada fog (impact).

Hab wanaagsan oo la xidhiidha saamaynta iyo hawlaha waxaa loo yaqaanaa BASNEF¹ MODEL, (eeg tusaha 1aad). Habka BASNEF waxa uu u taagan yahay (waxyaalaha la rumaysan yahay (Beliefs), sida waxaas loo arko (Attitudes), Ujeedooyinka (Subjective) xeerarka iyo shuruucda (Norms) iyo waxyaalaha awoodda saamaynta ku leh (Enabling factors). Waa erayo macno ahaan aan carab jalqin ahayn laakiin ay ku jiraan dhamaa arimahii khusaynaayay.

¹ Tusalahi BASNEF waxaa kooray John Hubleby sanadka 1993

Tusaha 1aad: Habka BASNEF (BASNEF model)

	Saamaynta	Ficilada loo baahan
Waxyaalaha la rumaysan yahay ama sida wax loo arkaayo ee (qofka ahaaneed) <i>(Beliefs & Attitude)</i>	Arimaha dhaqanka, caadooyinka, war baahinta, wax barashada iyo waayo aragnimada	Barnaamijyo is gaadhsiinta ah si loo bedelo waxyaalaha, qaladka ah ee sida adag loo rumasan yahay xaga dhaqanka ahaan
Xeerarka ujeedada leh (bulsho ahaan) <i>(Subjective Norms)</i>	Qoyska, bulshada, habka bulshada isku xidha, dhaqanka, awoodda maamulka, cadaadiska muuqda	Xidhiidhka si toos u gaadha dadka guriga ama bulshada dhexdooda kuwa saamaynta leh
Qodobada awoodda saamaynta ku leh (Qodobada) <i>(Enabling Factors)</i>	Dakhliga, faqriga, adeegga nadaafadda, heerka haweenka, sinaan la'aanta, shaqada, beeraha	Barnaamijyo lagu hagaajinaayo dakhliga, taageerada nadaafadda, xaaladaha haweenka, guriyaynta, xirfad barashada

Marka habkan loo eego habkan ama dariiqadan qofku waxa uu qaadanayaa hab dhaqan markaas uu isagu ama iyadu **rumaysanaayo** in hab dhaqankani uu keenay faa'iidooyin ku filan – oo dhinac caafimaadka, dhaqaalaha ama meelo kale oo la mid ah – waxaana uu tixgelin siinayaa muhiimadda ay faa'iidadani leedahay. Dabadeed waxa uu qofku yeelanayaa **inuu si sax ah u arko wax wanaagsan** inuu ku sameeyo is bedel hab dhaqankiisa. Saamaynta togan ama taban ama raadka xun ama wanaagsan sidoo kale **xeerarka ujeedada leh** ee ka imanaaya kuwa kale ee kala duwanaanta deegaanka qofku ku nool yahay kuwaasi oo uu qofku u arko inay muhiim u yihiin ayaa sidoo kale raad ku yeelanaaya go'aan qaadashada inay qaataan hab dhaqanka cusub, xirfadaha waqtiga iyo habka **qodobada awoodda saamaynta ku leh** iyagana waxaa sidoo kale loo baahan yahay in lagu dhaqmo.

Marka hab dhaqanka cusub dabadeed si dhab ah loo helo ee faa'iidooyinka degdegga ah la gaadho – deegaan nadiif ah, fakhriga hoos loo dhigo, aqoonsiga tixgelinta waxyaalaha kale – waxa ay u badan tahay markaa in ay taasi tahay mid sii socon doonta. Hagaajinta caafimaadka waa mid kamid ah faa'iidada degdegga ah. Sidaa darteed maaha in sababaha waawayn ee hab dhaqanka cusub loo qaatay. Sidoo kale marka la waydiiyo dadka waxa ay u siinaysaa sabab ah inay sidii ay filayeen kuugu

jawaabaan sidii inay ogaayeen in natiijadu ay sidaas noqon doonto. Inta badan waxaa jira arimo kale oo khusaynaaya kuwaasi oo ku dhiirigeliya xubnaha bulshada inay si caadi ah ula qabsadaan hab dhaqanka wanaagsan ee fayodhawrka ku slaysan, waxaana muhiim ah in bulsho kasta oo ka mid ah aad ogaato waxyaalaha ku dhiirigelin kara iyaga.

Iyadoo aad waydiinta keliya ee dadka inay hab dhaqankooda ay badalaan aanay ku filayn. Gaadhitaanka sida ay u arkaan nadaafadda iyo fayodhawrka bulshadu iyo hab dhaqankooda oo wax laga bedelaa dhamaan shaqsiyaadka iyo bulshooyinkaba waxa ay si balaadhan ugu xidhan tahay ilaa heerka kartida wax qabad ee dadka horumarka bulshada ka shaqaynayaa ay fahamsan yihiin waxyaalaha halkaas laga rumaysan yahay iyo sida ay ugu suurto gasho inay arimaha muhiimadda leh wax uga qabtaan iyagoo adeegsanaaya aqoonta. Doodaha la xidhiidha iyo is dhexgalka dhamaan dariiqada BASNEF waxaa loo samayn karaa iyadoo la adeegsanaayo habka si wada jir ah uga qayb qaadashada ku haboon sida qalabka tusayaasha lawada arki karaayo sida kuwa aan xagga dambe ku sheegi doonno buugan tilmaamaha ah. Adeegsiga qalabkaasi waxa ay kuu suurto gelinaysaa in laga doodo waxyaalaha xaasaasiga ah lana xaqiijiyo in xataa dadka aan qorista iyo akhrisak aqoonin ay si waxtar leh uga qaybgali karaan doodaha.

2.5. Faahfaahinta 5 shanta qaybood ee nadaafadda

Marka ay ka qaybgalayaashu ay fahmaan macnaha ereyada nadaafadda iyo fayadhowrka iyo sida aan labada loogu kala saari karin xaqiijinta nadaafadda guud, markaas iminka waa waqtigii aan mid kasta oo ka mid ah qaybaha nadaafadda aan si faahfaahsan aan u muujinno in mid kastaa ay iskeed muhiim ugu tahay gaadhitaanka heerka caafimaadka wanaagsan, iyo in hab dhaqanka basrinta ama hagaajinta saxarada dadku ay tahay talaabda koowaad ee ka hortagga xanuunada shubanka keena. Hab dhaqanka ku haboon iyo ku dhaqanka qayb kasta oo ka mid ah qaybaha faydhawrka ayaa halkan hoose lagu sheegayaa:

2.5.1. Nadaafadda qof ahaaneed

Waa hab dhaqanka qof ahaaneed ama saamaynta shaqsi ahaaneed marka loo eego nadaafadda shaqsiga ee naftiisa, taasi oo raad ku yeelanaysa qofka caafimaadkiisa iyo caafimaadka dadka kaleba si xumaan ama wanaag leh labadaba. Ficilada muhiimka u ah fayodhawrka qof ahaaneed waxaa ka mid ah:

- Gacmaha oo saabuun lagu maydho ama dambas waqtiyada muhiimka ay tahay ee soocda
 - Marka aad saxaro taabato, sida marka aad suuliga gasho ama aad caruurta saxarada ka maydho.
 - Ka hor inta aanad cuntada karin ama aanad ka soo gurin.
 - Wax cunista ka hor.
 - Ka hor intaanad caruurta cunatada siinin.
 - Ka dib marka aad qashinka taabatid.
 - Ciyaarta ka dib – tani aad bay muhiim ugu tahay caruurta oo marka ciyaarayaan laga yaabo inay saxaro taabtaan ama wax kale oo aan nadiif ahayn aqoon la’aan darteed.
- Maydhashada jidhka oo la jooqteeyo.
- Ciddiyaha oo iska guro oo kuwo gaaban oo nadiifa ha laga dhigo, waayo saxarada ayaa ku qarsoomi karta cidida hoosteeda.

- Cadayga cunto kasta dabadeed.
- Nadiifinta gogolaha jiifka.
- Xidhashada maryo iyo kabo nadiif ah.
- Nadiifinta iyo hagaajinta timaha.

2.5.2. Saxarada meelaha lagu daadinaayo oo la basriyo

Saxarada dadku waa waxa keliya ee ugu muhiimsan ee ay ka timaaddo xanuunada shubanka lihi waana in la siiyaa dareenka muhiimadda ugu saraysa ee waxbarashada ku saabsan nadaafadda iyo fayodhawrka. Waxaa la caddeeyay in wasakhaynta deegaanka gaar ahaan saxarada ay la macna tahay inay saxaradu ku socoto sidii ay dib ugu noqon lahayd jidhkeennii iyadoo u soo maraysa dariiqyo iyo habab kala duwan.

Arimaha fayadhowrka u muhiimka ah waxaa ka mid ah:

- Basri saxarada dadka si looga badbaado, meelaha ku haboon gee, sida si sax ah u isticmaalka suuliyada.
- Nadiifi, maydh oo dabool suuliga.
- Ku maydh gacmahaaga biyo iyo saabuun (ama dambas haddii biyo aanay jirin) saxarada ka dib ama marka caruurta aad ka maydho saxarada. (tan waxaynu ku soo sheegnay qaybta nadaafadda shaqsiyeed)

2.5.3. Nadaafadda guriga iyo dadka nu nool

Tani waxa ay ka kooban tahay nadaafadda guriga iyo hareerihisa, waxaa lagu gaadhi karaa fayodhawrka guriga iyo dadka ku nool iyadoo:

- Guriga iyo wax kasta oo yaalaa nadiif ahaado, nadiifinta guriga dushiisa, alaabta, weelka iyo qalabka kalee guriga yaalla
- Xaqiijinta in biyo taagani aanay u dhawayn guriga agagaarkiisa waayo waxa ay u noqon kartaa meel ay kanecadu ku dhasho
- Xaadhista aqalka agagaarkiisa, jarista dhirta taasi meel ay ku dhuumato u noqon karta kanecada

- Meel sax ah oo lagu qubo qashinka engegan sida waraaqaha, bacaha, maryaha madhay, quraaradaha jabay, digada xoolaha iwm.
- Meel sax ah oo lagu daadiyo qashinka qoyan sida hadhaaga cuntada, biyaha uskaga ah, qolofa khudrada iwm.

2.5.4. Nadaafadda biyaha

Tani waa in laga ilaaliyo biyaha fadareynta dhamaan wixii wasakhaynaaya iyo hubinta nadiifnimadooda inay ka badbaadaan wax caloosha ka soo baxay, sida hubinta nadiif ahaanta haddii ay ku xumaan karaan heer kasta sida halka ay ka yimaadeen, soo qaadista ama kaydinta.

Ilaha biyaha gaar ahaan kuwa miyiyadu had iyo jeer way wasakhoobaan maadaama aanay dabool lahayn. Meelaha inta badan ay biyuhu ka soo baxaan waxaa ka mid ah:

- Meelaha baliyada biyo qabatinka ah (balleys, war and berkad).
- Ceelasha gunta gaaban ee furan.
- Ceelasha gaaban ee bamka gacanta loo adeegsado.
- Wabiyada.
- Ceelasha dhaadheer ee inta badan magaaloooyinka iyo tuulooyinka dadka badan leh.
- Biyaha roobka ee gu'ga.
- Biyaha roobka oo lagu ururinayo istamaalka majaroorka, nawaxiga magaaloooyinka.

Markaa in badan ee meelaha ay biyuhu ka yimaadaan kuwa ceelasha dhaadheer ee biyaha dhulka hoostiisa ka soo baxa oo keliya ayaa ka ah halka ay saafi ama nadiif yihiin biyuhu, ayna wasakhaysneyn. Dhamaan meelaha kale waxa ay u furan yihiin wasakhawga meesha ay ka imanayaan waana in la daaweeyaa ka hor intaan la cabin. Xataa biyaha nadiifta ah ee ceelasha dhaadheer iyo kuwa gaagaaban kuwa ka soo baxa ama kuwa bamka gacanka lagu soo saaro waxa ay ku wasakhoobi karaan sida

loo soo qaadayo ama loo kaydinaayo, waana in laga taxadira oo la xaqiijiya in ay weli saafi ama nadiif yihiin ka hor intaan la cabin

Sida loo xaqiijinayo tayada biyaha nadiifta ah min halka ay ka soo baxeen ilaa afka

- Xaqiijinta in aanay saxarada dadku gaadhin biyaha marnaba halka ay ka soo baxeen ama inta la kaydinaayay, taas waxaa lagu gaadhi karaa isticmaalka suuliyada marka la saxaroonaa. Saxarda u dhaw meelaha biyuhu ka soo baxaan ama, gaar ahaan ceelasha afka banaana, ama biyo qabatinada kaymaha, daamamka waxaa iska cad in isla marka uu roobku da'o ay biyaha roobku si toos ah ugu darayaan meelaha biyuhu ka yimaadaan ee furan taasi waa sababta ay xanuunada shubanku ugu badan yihiin xiliyada guga iyo dayrta, xiliyada oomanaha ah biyaha la kaydiyay, dadka iyo xayawaanku waa isku qabsadaan biyaha, nooc kasta oo biyo ahna waa la isticmaalaa iyada oo aan loo eegin halka ay ka soo baxeen ama tayada biyaha, sidaa darteed ayay bataan dhicitaanka xanuunada biyaha la xidhiidhaa ee shubanku xataa xilliyada oomanaha ah.
- Dhisidda moos dheer oo ku wareegsan meelaha biyaha laga helo si looga ilaaliyo wasakhawga u soo raacaaya biyaha daadka.
- In loo sameeyo meelo laago ah oo biyuhu ay raacaan si ay u socdaan oo aanay ugu fadhiisan meelaha u dhaw ceelasha si looga hortago wasakhawga biyahaas ag fadhiyaa inay gaadhaan gaar ahaan ceelasha aan gunta u sii dheerayn.
- In laga dhiso suuliyada iyo meelaha lagu maydho meel ka fog oo 50 ilaa 100 mitir u jirta halka biyaha laga soo saaro.
- In laga ilaaliyo xayawaanka ama xoolaha inay galaan meelaha biyaha dadku ka cabbaan iyadoo xoolaha lagu waraabinaayo meelo u gaar ah lagana oodaayo meelaha biyaha laga soo saaro.

- In lagu shubo meel nadiif ah biyaha marka laga soo qaadayo halkii ay ka soo baxeen, ama lagu kaydsanaayo guriga.
- In la darsado weel nadiif ah ama lagu shubto marka la cabaayo ama laga soo qaadayo weelka ay ku jireen.
- Ha gelin ama ha taabsiin gacanta ama shay kale wax wasakh leh biyaha la cabaayo
- Haddii ay kuu suurto galayso nadiifi biyaha adigoo adeeegsanaaya habka nadiifinta biyaha ee laga heli karo ama kuu suurto galka ah (sida ciida oo laga shaqa shaqo, daawada kolariin oo biyaha lagu daro iyo waliba biyaha oo la kar kariyo meel kaste oo aad joogto).
- Haddii ay suurto gal tahay weelka biyaha lagu kaydinayaa waa inuu qasabad hoosta ku lahaadaa.

2.5.5. Nadaafada cuntada

Tani waxa ay ku saabsan tahay habsami u maamulidda cuntada, laga soo bilaabo sida loo haynaayo, karinaayo, loona diyaarinaayo cunista iyo habka loo kaydinaayo ama loo iibinaayo. Waqtiyada ugu daran habsami u maamulista cuntada ee keeni kara inay cuntadii halowdo waxaa ka mid ah:

Marka gacanta lagu hayo, marka la karinaayo ama loo gurayo dadka

- Isticmaalid gacmo wasakhaysan.
- Isticmaalid weel/haamo ama miiska cuntada qaydhiin lagu dul jarjaro.
- In la dhigo cunto qaydhiin ama bisilba meelo banana oo ay kusoo xoomi karaan,

dukhsi farabadan, jiir ama baranbaro farabadan.

- Miisaanta cuntada lagu diyaariyo oo wasakhaysan sida kuwa makhaayadaha.

Wagtiga la karinaayo

- In cuntada lakariyo iyadoon si fiican loo maydhin, ama biyo wasakha lagu maydho.
- Inaan cuntada si fiican loo bislayn (ama cunto badh qaydhiin ah dadka loo guro).

Wagtiga la cunaayo

- Isticmaalid weel nadiif ah iyo qalabka jikada oo biyo nadiif ah ah lagu maydhay.
- Gacmo nadiif ah oo cuntada lagu cunno.
- Cunista cunto bisayl ah oo si fiican loo Kariyay.
- In la cuno cunto qabawday oo kharibantay madaama oo aanay sugnayn ama daboolnayn (cuntada waa in si fiican loo kululeeyaa haddii ay qabawday, taalayna ilaa 2 saacadood iyo waxii ka badan).

Marka la kaydinaayo ama haysashada

- Inaan meel lawada dhigin raashin qaydhiin iyo cunto bisil.
- Incuntada lagu kaydiyo weel wasakhaysan.
- In aan la kaydin cuntada bilaa dabool ama aan si haboon loo daboolin tasoo u sahlaysa inay cayaayanka sida dukhsiga, baranbarada iyo jiirkuba ay galaan.

Qaybhaas kore waxaa lagu soo koobayaa tusahan soo socda.

Tusaha 1aad: Soo koobidda qaybaha nadaafadda iyo talaabooyinka wax ka qabad ahaan ah hab dhaqanka ku haboon

Qaybta Nadaafada	Talaabooyinka wax ka qabad ahaan ah hab dhaqanka ku haboon
<p>Nadaafada qof ahaaneed</p>	<ul style="list-style-type: none"> • Gacmaha oo saabuun lagu maydho ama dambas waqtiyada muhiimka ay tahay ee soocda <ul style="list-style-type: none"> – Marka aad saxaro taabato, sida marka aad suuliga gasho ama aad caruurta saxarada ka maydho – Ka hor inta aanad cuntada Karin ama aanad ka soo gurin – Wax cunista ka hor – Ka hor intaanad caruurta cunatada siinin ama aanad afka ugu gurin • Maydhashada jidhka oo la joogteeyo • Ciddiyaha oo iska guro oo kuwo gaaban oo nadiifa ha laga dhigo, waayo saxarada ayaa ku qarsoomi karta cidida hoosteeda • Cadayga cunto kasta dabadeed • Xidhashada maryo iyo kabo nadiif ah • Nadiifinta iyo hagaajinta timaha
<p>Si wanaagsan isaga basrinta saxarada sida ta caruurta</p>	<ul style="list-style-type: none"> • Si saxa oo suuliyada loo isticmaalo • In suuliyada la nadiifiyo lana daboolo • Gacmaha oo saabuun ama dambas lagu maydho suuliga ka dib
<p>Nadaafada guriga iyo deegaanka</p>	<ul style="list-style-type: none"> • Qashinka oo la iska ururiyo laguna gubo meel lagu riday • Gubista xoolaha iyo waxa ka soo baxa sida digada xoolaha iyo waxyaalaha kale wasakhada ah ama hadii loo isticmaalaayo nafaqaynta carrada in laga iibiyo beeralayda • Dib u isticmaalka waxyaalaha aan dib loo isticmaali karin • Si wanaagsan in loo isticmaalo suuliyada iyo meelaha wax lagu maydho ama lagu maydho • In guriga iyo dhamaan maqsinada iyo waxa dhex yaalla oo dhamai ay ahaadaan kuwo nadiif ah oo hagaasan • In laga fogeeyo biyaha uskaga ah meelaha biyaha laga soo saaro • In dayr ama waageer ama dhir ah ama ood kale ah loo sameeyo meelaha biyuhu ay ka soo baxaan • In laka saaro meelaha xoolaha iyo dadku ay biyaha ka cabayaan

Qaybta Nadaafada	Talaabooyinka wax ka qabad ahaan ah hab dhaqanka ku haboon
Nadaafada biyaha	<ul style="list-style-type: none"> • Ilaalinta nadiifnimada meelaha biyaha laga soo saaro iyadoo la oodaayo si wanaagsanna loo isticmaalaayo • Soo qaadista iyo kaydinta in lagu isticmaalo weel nadiif ah • Biyaha la cabaayo iyo kuwa waxyaalaha kale ee guriga sida maydhista oo kale loo isticmaalaayo waa in lakala qaybiyaa oo meelo kala duwan lagu kaydiyaa • Waa in weel u gooni ah la darsadaa biyaha la cabayaa meesha ay ku jiraan, haddii ay suurto gal tahayna biyaha la cabayaa weelka ay ku jiraan waa inuu hoosta qasabad ku lahaadaan • Biyaha ka yimaadda meel aan nadiif ahayn waa in la daweyyaa ama lagu nadiifiyaa koloriin, Karin, sifayn ama shaandhayn iyo sidii kale ee suurtoagal ah
Nadaafada cuntada	<ul style="list-style-type: none"> • Gacmaha oo saabuun lagu maydho ka hor inta aan cuntada la taaban(ka hor diyaarinta iyo ka gurista) • Cuntada oo si fiican loo maydho ka hor intaan la Karin • Si sax ama dhamaystiran oo loo kariyo cuntada gaar ahaan hilibka • Cuntada oo lagu guro weel nadiif ah • Cuntada oo lagu rido ama lagu hayo weel nadiif ah • Kala duwista meelo kala duwan la dhigaayo cuntada qaydhiin iyo ta bisil ama karsan • Meesha cuntada lagu diyaarinaayo kijinka waa inay nadiif ahaato • Cuntada waa in la daboolaa si duqsiga, baranbarada iyo jiiirka looga ilaaliyo • Markasta waa in la cunaa cunto kulul, cuntadana waa in la kululeeyaa haddii ay qabawday 2 saacadood iyo wax ka badan • Iska ilaali in faraha la geliyo cuntada aan markaas la cunaynin • Waa in si fiican loo maydhaa cuntooyinka aan la krin ee qaydhiinka lagu cuno sida saladhka • Halku dhegga nadaafada cuntada waa: kari, maydh ama iska daa, sida laga soo xigtay ka qaybgalayaashii tababarka aqoon iswaydaarsigii ku saabsanaa nadaafadda iyo fayodhawrka ee lagu qabtay Hargeysa.

QAYBTA 3 - TALAABOYINKA ISKU XIGXIGA EE PHAST



Produced by Caritas Switzerland/Luxembourg, COOP, Oxfam GB and BCF UK



Produced by Caritas Switzerland/Luxembourg, COOP, Oxfam GB and BCF UK



Produced by Caritas Switzerland/Luxembourg, COOP, Oxfam GB and BCF UK

Qaybta 3 -Talaabooyinka isku xigxiga ee PHAST

TALAABADA 1AAD: Kaqaybqaadashada bulshada (*Community Entry*)

Talaaboyinka ayaa waxaa ay kacaawineysaa kooxda in ay fahmaan kaalinta ee ha'adaha iyo dhiiri galinteed kaqeybgalka howlaha.

Hawsha: Kaqaybqaadashada bulshada

Agabka: Wabiga oo laga talaabo (si metelaad ah) (*The River Crossing*)



Ujeedada hawshan (*Purpose*)

In ay ka qayb galayaashu ku ogaadaan xidhiidhada kala duwan ee Haya'ado kala duwani ay sida caadiga la yeeshaan bulshada, looguna muujiyo muhiimadda ka qayb qaadashada bulshada ee mashaariicda ay wadaan sidoo kale waa in loo qeexaa ama loo sharaxaa, waxa ka qayb galayaasha kaga aadan soo biirin, lahaansho iyo maareynteeda



Waqtiga (*Time*)

45 daqiiqo



Alaabada (*Materials*)

ulo, dhagxaan iyo meel banana



Waxaa jira saddex qof metelaadda – laba qof oo socdaal ah (nin iyo naag) iyo xeroole xoolo haysta (geeljire) waxaa dhacay fatahaad webi oo saddex dhagax dhigay meel in isku mid ah isu wada jira wabiga dhexdiisa, waxaana loo isticmaali karaa in webiga lagaga talaabo waxaase ay u baahan tahay dhiirigelin iyo taxadir cayiman oo haddii qofka wabiga kaga tallaabayaa uu qalad yar sameeyo waxa uu ku siiban doonaa wabiga kaasi oo si dhaqso ah ula tegaaya. Labada socotada ahi lama socdaan waxna Kama oga fatahaaddii wabiga. Ninka xoolo dhaqatada ahise wuu yaqaanaa webiga waana ku xirfad bartay sida loo isticmaalayo saddexda dhagax ee webiga loogaga talaabo.

Matalaaddu waxay ka bilaabmaysaa labada qof ee socotada ah ninka iyo naagta oo ka soo socda meel fog kuna soo jeeda wabiga, waxa ay ku mashquulsan yihiin wada sheekaysi, ninka xoolo dhaqatada ahi waxa uu ku hawlan yahay ilaalinta ama daajinta xoolihiisa ee wabiga dhinaciisa mana dareensana labada qof ee socotada ah, si lama filaan ah ayay webigii u soo gaadheen oo ay ku naxeen fatahaadda dhacday, mana karaan inay ka talaabaan marka laga reebo saddexdaas dhagax oo ay arkaan taas oo inay dul maraan dhagaxdaas mooyee si kale oo ay uga talaabaan majirto, iyadoo ka fekeraaya waxa ay samayn lahaayeen ayaa ay arkeen ninkii xoolo dhaqatada ahaa waanay u dhawaaqeen si uu u caawiyo. Ninkii xoolo dhaqatada ahaa wuxuu tusay saddexdii dhagax waxaana uu u sheegay inay isticmaalaan si ay wabiga ugaga talaabaan, aad ayay uga baqeen ninkii socotada ahaa wuu diiday inuu isku dayo ka talaabista wabiga ilaa uu ninkan xoolo dhaqatada ahi qaado oo uu ka tallaabiyo. Ninkii xoola dhaqatada ahaa wuu aqbalay codsigiisii isaga oo aan wax shuruud ah ku xidhin, waxaanuu isla markiiba u soo jeediyay ninkii soctada ahaa inuu dhabarka ku qaado oo uu wabiga ka talaabiyo. Markii ay dhagaxa dhexda ee wabiga badhtamihiisa ah gaadheen ayuu ninkii xoolo dhaqatada ahaa daalay oo sii sidi Kari waayay markasuu dhigay ninkii dhagaxa dushiisa oo uu waydiiyay ninkii socotada ahaa inuu sii wado safarka oo dhagax keliya ayaa kuu hadhay si aan dhinaca kale u gaadhno ku yidhi. Ninkii socotada ahaa wuu dhaqaaqi kari waayay isagoo baqdin la gariiraaya webiga dhexdiisa, isla markaas ayaa ninkii xoolo dhaqatada ahaa wuxuu ku laabtay dhinacii webiga ee ay ka yimaadeen si uu u soo qaado gabadhii oo u talaabiyo. Gabadhii waxa ay diiday inuu qaado waxaanay waydiisatay inuu tuso ama baro sida loo maraayo ee dhagaxda loo isticmaalaayo kaga talaabista webiga. Markaas ayuu ninkii gacanta soo qabtay oo si wada socod ah ayay webigii uga wada tallaabeen markii ay dhagaxa badhtamaha yaalla maraayeen ayuu ninkii xoolo dhaqatada ahaa u sheegay gabadhii inay keligeed socoto oo ay inta hadhay halkaas ka sii waddo ilaa dhinaca kale ee talawga webiga. Ka dib markii ay dhiirigelin ama taageero iyo waaya aragnimo heshay, si aa yar ah oo adag islamarkaa taxadir kujiro laakiin doonis adagi ku jirto ayay ku gaadhay dhinaca kale ee webiga. Marka dhinaca kale laga eego waxa ay dhiirigelisay ninkii wehelkeeda ahaa inuu dedaal iyo isku day sameeyo oo uu webiga ka talaabo, ugu dambayn isagoo werewersan baqashana ku jirto waxa uu dhibkastaaba ha jirtee ku guulastay aakhirii inuu u talaabo dhinaca kale.

Waxyaalaha la qabanaayo:

1. U sharax kooxda inay riwaayad meteli doonaan waydiiso inay saddex qof oo iskood ugu diyaar ah inay ka qayb galaan oo ay gabadhi ku jirto
2. Kala soo dhex bax saddexda qof ee diyaarka kooxda inteeda kale una sharax mid kastaaba in uu ka qayb qaadanaayo riwaadda
3. Ku sawir xariijimo dhulka aad ku muujinayso qarka webiga iyo goobooyin u taagan dhagxaanta
4. Marka ay metelayaashii diyaar garoobaan u sheeg ka qaybgalayaasha inay u soo baxaan oo ay daawadaan riwaayadda, u sheeg inay qoraan wixii ay arkaan, maqlaan ama ay ka bartaan metelaadda iyo inay ka fekeraan waxa ay soo jeedinayaan ee dhinaca horumarinta fayadhawrka iyo nadaafdda guud ku saabsa
5. Dardar galinta doodaha iyadoo la eegayo fikra daha dadka

TALAABADA 2AAD : Dhibaataada oo la garto (Problem Identification)

Hawshani waxa ay ujeedadeedu tahay in la cadeeyo dhibaatooyinka caafimaad ee bulshadeena iyoin diirada la saaro arimaha la xiriira caafimaadka.

Hawsha: Dhibaatooyinka caafimad ee bulshadeena

Agabka: Jadwalka taariikh xilliyeedka (Seasonal Calendar)



Ujeeddada (Purpose)

In la aqoonsado ama la garto cudurada sida caamka ah ama inta badan bulshada ku dhaca iyo xilliga ay dhacaan iyo sababaha keena



Wagtiga (Time)

1 – 2 saacadood




Alaabada (Materials)

Qalimaan, waraaqo, waraaqaha balaadhan ama balaaraan

Ololaha wax qabad ee nadaafadda guud iyo fayodhawlka waa inay ka bilaabantaa heerka aqoonta ee bulshadu ay markaas leedahay, sida ay wax u arkaan iyo hab dhaqanka ay leeyihiin, waana inay ahaato dhibaato la wajahaayo oo si gaar ah diiradda loo saaraayo dhibaataada caafimaad ee dadku ay qabaan, waana in sidaa darteed ay suurogeli kartaa in ay gartaan oo la xidhiidh sanaataa iyaga. Waa mid aan waxba tarayn dadka oo lagala hadlo xanuunada shubanka keena haddii aanay ku dhicin bulshadooda.

Sababahaas dartood waxaa muhiim ah in hagaajinta fayodhawlka iyo nadaafadda guud laga bilaabo fahamka xanuunada badanaaba ku dhaca bulshadaas iyo xilliga ay badanaaba dhacaan ama dib u soo dilaacaan. Aqoontaasi waxa ay caawinaysaa in la isku xidhiidhiyo hab dhaqanka dadka waxa ay sameeyaan xilliyada kala duwan iyo xanuunada shubanka keena si taasi loo ogaado inay tahay mid guud.

Si loo fududeeyo doodaha ku saabsan xanuunda caamka ah iyo xilliyada ay dhacaan ama soo noqdaan ee bulshada dhexdeeda. Hababka ugu haboon ee aragti mid ah oo sida wadajirka ah looga wada qayb gelayaa agabka loo adeegsanayaa ama dariiqada loo marayaa waa “taariikhda xilliga” taariikhada xilliyada waxa ay inaga caawinaysaa inaan ogaanno marka ama xilliga ay roobabku jiraan si aan u ogaanno nooca cudurada dilaaca ama soo noq noqda iyo xilliga ay halka ugu saraysa waxyeeladoodu ay gaadho. Waxaa kaloo ay inaga caawinaysaa inaan ogaanno marka biya yaraantu jirto iyo marka ay biyuhu badanaaba wasakhoobaan, waxa ay kaa caawinaysaa inaad si fiican u sii qorshaysato xilliga soo socda waxaanad awoodi kartaa inaad tallaabooyin ka hortag ah aad qaaddo oo ku wajahan dilaaca cudur cayiman.



Waxa la qabanayo:

1. In la sameeyo taariikh xilliyeed waxaad waydiinaysaa kooxda ugu horayn xilliyada sanadku kuwa ay yihiin
2. Waydii kooxda inay ka doodaan xanuunnadee baa ugu badan bulshadooda iyo xilligee bay dhacaan iyo sidee bay khatar u yihiin
3. Waxa sahlan in ay xaashi ku sawiraan ama dhulkaba si dadku ay u wada arkaan.
4. Taariikh xilliyeedka waxaa sidoo kale lagu soo bandhigi karaa calaamado ama astaamo si muuqaal ahaan loogu garto
5. Sudh taariikh xilliyeedka gidaar, (geed ama sabuuradda) ogaysiina ka qayb galayaasha in iyaga iyo adiga oo wada jira aad u isticmaalaysaan taariikhda tababar ahaan.
6. Haddii aad ku shaqaynaysaan kooxo yaryar oo loo sii qaybiyay kooxda waxaa kooxaha yaryari u soo bandhigi karaan kooxda oo dhan taariikhahooda.
7. Marka xanuunada guud la isku raaco iyo xilliga ay dhacaan ama dib u soo noqdaan xanuunadaasi, gooni u saar xanuunada shubanka iyo kuwa kale ee biyaha iyo nadaafadda guud la xidhiidha ee xilli kasta una fududee xubnaha bulshada in ay ka doodaan sababaha keenaaya, waydii kooxda inay ka fekeraan wax ama sida taasi ku dhacday.
8. Kooxda oo dhami ha ka wada hadlaan xidhiidhka ka dhexeeya xilliyada iyo xanuunada iyo sababaha keena. Ujeedada tababarka ee qaybtani waa in lagu muujiyo in badanaa xanuunadu ay ka yimaadaan biyo wasakh ah oo la cabo, ama cunto wasakhaysan oo la cuno ama nadaafad darro



Fiiro gaar ah:

Fududeeyaha tababarku (*The facilitator*) waxa uu ku hogaamin karaa doodaha hab aqooneed farsamaysan laakiin ka qayb galayaasha ayaa warbixinaha keenayaa.

Warbixin tixraac ah oo Liis ay ku qoranyihiin noocyada kala duwan ee shubanka, calaamadaha, habka looga hor tagi karo ama loo daawayn karo waxa ay ku lifaaqan tahay lifaaqa 1aad.

TALAABADA 3AAD: Lafagurka dhibaatooyinka (*Problem Analysis*)

Hawsha 1aad: Qiimaynta ama khariidadda biyaha iyo nadaafadda guud ee bulshada

Hawsha 2aad: Hab dhaqanka wanaagsan iyo kuwa xun xun ee ku saabsan nadaafada guud

Hawsha 3aad: Baadhitaanka sida bulshada u dhaqanto

Hawsha 4aad: Sida ay xanuunku u faafo

Agabka 1aad: Daraasadda baahiyaha bulshada

Agabka 2aad: Kooxaynta iyo kala saaridda noocyada saddex qayboodka ah

Agabka 3aad: Tuse Jeebadeed

Agabka 4aad: Dariiqyada xanuun gudbinta

Tallaabooyinkani waxa ay ka caawinayaan kooxda inay fahmaan sida hab dhaqanka joogtada ah ee nadaafadda guud iyo fayadhawrka maalin kasta ay u keeni karaan xanuunada shubanka. Waxaa dabadeed kuu suurto galaysa inaad bilaabi karto adiga oo tixgelinaaya waxa la qaban karo si loo hagaajiyo isticmaalka ama hab dhaqanka khaldan si xanuunada looga hor tago.

Hawsha 1aad: Qiimaynta ama khariidadda biyaha iyo nadaafadda guud ee bulshada

Agabka 1aad: Daraasadda baahiyaha bulshada (*Community Mapping*)



Ujeeddada (*Purpose*)

Waa in khariidad lagu ogaanaayo (*mapping*) la sameeyo si loo ogaado xaaladaha biyaha iyo fayadhawrka ee bulshada iyo sida ay isu saameeyaan.





Wagtiga (*Time*)

1 – 3 Saacadood



Alaabada (*Materials*)

Waraaqo, qalimaan, dhagxaan, kuulo, jajab alaabo kale iyo waraaqaha xabagta leh (*stickers*).



Waxa la qabanaayo:

1. Dib u eegid ku sameeya iyadoo ay kooxduna kula samaynayaan natiijada hawlihii hore ee la qabtay mid mid
2. Waydii ama u sheeg kooxda inay sameeyaan khariiradda bulshadooda, sida ay jecel yihiin inay u sameeyaan, u sheeg inay ku daraan xuduudaha, dariiqyada, guryaha, dugsiyada, masaajidada, meelaha ganacsiga, beeraha, meelaha biyuhu ka soo baxaan, adeegga nadaafadda guud, meelaha qashinka lagu qubo.
3. Waxaad kala shaqayn kartaa kooxda oo dhan ama haddii ay jirto kala duwanaansho xagga aqoonta hore iyo waaya aragnimada ah waxaa aad taa ka dhigan kartaa dariiqada ama habka aad kooxaha yar yar ku kala saarayso, habkasta oo aad doorato waa inaad xoogga saartaa inay tani tahay shaqo ama hawl qof kasta laga rabo (oo kooxda ka mid ah) ma aha qofka farshaxanimada yaqaan ama ka ugu wax barashada badan bulshada. Haddii aad la shaqaynayso kooxo kala duwan hubi inaad hesho kulan guud oo dhamaan dadka tuulada ama kooxda oo dhami ay ku soo bandhigaan wixii ay ka heleen baadhitaanada kala duwn ee ay ku soo sameeyeen.
4. Sii alaabada ay u baahan yihiin una sheeg inay ku dari karaan wixii ay jecel yihiin. Si loo sawiro khariirad sahlan, waxaa inta badan lagu samayn karaa dhulka, waxyaalaha looga baahan yahay in lagu sawiraana waa wax kasta oo markaas gacanta lagu hayo, sida ulaha dadka waaweyn qaataan ama ku tukubaan, ama dhagax, qoriyar ama loox yar, sabuuradda iyo tamaashiirta ayaa lagu sawiri karaa haddii kulanku fasal ka dhacaayo, waxaad u baahan doontaa inaad waraaqo iyo qalimaan isticmaasho si aad wax uga bedeshid khariidadda mid joogto ah oo qaab la daawan karo leh
5. Marka samaynta khariidaddu ay dhamaato u sheeg koox kastaa inay soo bandhigaan khariidadda tuuladooda sidii tusaha ama jiheeyaha qofka dhexmaraaya tuuladooda.
6. Ka dib soo bandhigidda kooxaha, u fududee in laga doodo meelaha saxarada iyo qashinka kale lagu daadiyo (isla markaa adiga oo waydiinaya kuwa si fiican loo meeleeeyay, kuwa dhibaatada keeni kara, waxa ka maqan khariidaddaha, meesha aanay dadku karaynin ama aanay heli karayn in ay suuliyo isticmaalaan marka ay saxaroonayaan, intee ayay u jirtaa meesha caafimaad ee ugu dhaw iwm,)
7. Waydii kooxda inay isku xidhaan hab dhaqanka fayodhawrka iyo nadaafadda guud iyo xanuunada la isla wada gartay ee taariikhda xilliyeedka.



Fiiro gaar ah:

Haddii hawsha khariidad samaynta lagu sawiraayo dhulka waydii qof ka mid ah dadka bulshada inuu ku wareejiyo waraaq si ay bulshadu ugu haystaan diiwaan ahaan oo mustaqbalka la adeegsan karo (qorshaynta hawlaha, kormeerka iyo xataa hay'adaha kale ee hawshan oo kale qabanaya iwm.)

Hawsha 2aad: Hab dhaqanka xun iyo ka wanaagsan

Agabka 2aad: Kooxaynta iyo kala saaridda noocyada saddex qayboodka ah (3 Pile Sorting)



Ujeeddada (Purpose)

In la is dhaafsado war bixinaha iyo doodaha ku saabsan hab dhaqanka guud ee nadaafada iyo raadka ama saamaynta ay caafimaadka ku leeyihiin.




Wagtiga (Time)

1 – 1½ saacadood



Alaabada (Materials)

Agab sawirro waraago iyo waxyaalo kale oo kala duduwan oo alaabada loo baahan yahay ka mid ah, kaadhahd kala noocyo duwan, kuwo xun kuwo wanaagsan ama u dhexeeya.



Waxa la qabanaayo:

1. Hadii waqti kala go'ay sida nasasho oo kale u dhexeeyo hawshan iyo middii ka horaysay ku bilaw dood kooxda dhex marta oo ujeedadeedu ay tahay in dib loo eego waxyaalihii lagu soo bartay ama lagu go'aansaday kulamadii ka horeeyay.
2. Waydii ka qayb galayaasha inay isu qaybiyaan kooxo yar yar.
3. Sii koox kasta in is le'eg oo sawirro ah oo u sheeg inay u kala saar saaraan sawirrada saddex qaybood, (wanaagsan) hawlaha kuwa ku wanaagsan caafimaadka, (xun) hawlaha ku xun caafimaadka, (dhexdhexaad) kuwa u dhexeeya labada ee aan ku wanaagsanayn ama ku xumayn caafimaadka ee ama aanad hubin.
4. Marka ay ka qayb galayaashu u kala saaraan sawiradii 3 daas qaybood waydii inay u sharxaan kooxda oo dhan sida ay u kala saareen iyo wax ay ku saleeyeen kala saar saariddooda.
5. Fududee dood kooxda dhexmarta oo ku saabsan sida kala door doorashada loo sameeyay sida kala duwanaantooda iyo sababaha loo raacay, fududee sidoo kale doodaha haddii dadku u muuqdaan in aanay isku raacin, hana ku darin sawirnaba qayb kale, laakiin waydii waxa ay iyaga la tahay inay ku kala duwan yihiin una ogolow inay dadka kale kala doodaan.
6. Waydii haddii dhaqamada halkanlaga soo bandhigay ay caadi ka yihiin hab dhaqanka bulshadooda.
7. Waydii ka qayb galayaasha inay isku xidhiidhiyaan hab dhaqanka iyo xanuunada la isla gartay ee xilligooda la isku raacay iyo dhibaatooyinka la gartay ka dib markii hawsha khariiradda bulshada ama tuulada lagu sawiraayey.
8. Waydii ka qayb galayaasha waxa la bartay iyo waxa ama sida ay xidhiidh ula leedahay hawshani gaar ahaan.



Fiiro gaar ah:

Marka dadka la waydiinaayo waxa ay sidaa u sameeyeen waa inaan laga ogolaanin inay wax ku qariyaan kelimaadka “waa dhaqankayaga” ama waa wax iska raali gelin ah laakiin waa inay darsaan sababaha waawayn ee dadku sidaa u samaynayaan

Hawsha 3aad: Baadhitaanka sida bulshadu u dhaqanto

Agabka 3aad: Tuse jeebadeed (*Pocket Chart*)

Tusaale:



Ujeeddada (*Purpose*)

In kooxda laga caawiyo inay soo ururiyaan, isku hagaajiyaan darsaanna war bixinaha ku saabsan hab dhaqanka nadaafadda ee shaqsigu ah.



Wagtiga (*Time*)

1 – 2 saacadood



Alaabada (*Materials*)

Qorshaha gacanta lagu samaynayo, kolba sida qalabka gudaha looga heli karo, (weel, teneg, baaldi), sawirada meelaha lagu saxaroodo, 9 sida suuliyada, meeloo banaan ah, kayd wayn, xidh geed gaab ah, webiga, iwm, agabka codbixinta sida dhagxaan, midho ama waraaqo cad.

Waxa la qabanaayo:

1. Haddii uu waqti nasasho ahi u dhexeeyay labada hawlood tan middii ka horaysay, ka bilaw in kooxda ay ka doodaan dib u eegid waxyaalihii la soo baratay ama la go'aansaday kulamadii hore.
2. si aad uga bilawdo, waydii dadka magacyada meelaha lagu saxaroodo ee agagaarka kuwaasi oo mar mar uun la isticmaalo ama markastaba , kuwaasi oo noqon kara suuliyada ama meelo banan sida dhinacyada qalalan ee webiga, oodda ama xayndaabka meelaha biyaha qabatinka ah ama ceelasha gaaban loo samaeeyay dabadooda, keymaha agtooda iwm.
3. Dooro sawir gacmeedka tusaaya meelahaas ama ku samee sawir gacmeed kale waraaqo banaana oo cad.
4. Ugu dheji sawiradaas si gudban gidaarka ama dhulkaba.
5. ku samee sawirada nin, naag ilmo yar iwm si jog ah si aad u qaabayso qorshaha sawiraadda ah.
6. Dhig baaldiga hoostiisa mid kasta oo sawirada ka mid ah hoostiisa ee layn kasta.
7. habka qorshaynta ee sawirada la isticmaalaayo wax uu ku samaysmayaa sida ay dadku ugu dhiiban karaan alaabda codaynta iyagoo aanay dadka kale arkin.
8. u sharax sida ay sawiraadda qorsha ku samaynta ee baaldiga la adeegsanayaa ay tahay iyo sida qarsoodiga ah ee loogu adeegsan karo wax bixin ururinta ku saabsan waxyaalaha ay dadku ka sameeyaan bulshada dhexdeeda.
9. Qof kasta oo jooga² sii waxa uu ku bixinaayo codka (waxa ay noqon kartaa dhagax yar, midho, ul yar, ama wax kasta oo gacanta lagu hayo oo la tirin karo).
10. waydii mid kasta oo kooxda ka mid ah inuu ku rido codkiisa baaldiga sawirka ku beegani tilmaamaayo meesha ay inta badan ku saxaroodaan, iyo laynka kale ee tilmaamaya rag, dumar iyo caruur ka ay yihiin.
11. marka ay xubnaha oo dhami codeeyaan waydii qof iskii ugu diyaar ah oo iyaga ka mid ah inuu tiriyo codadka baaldi kasta ku jira oo uu muujiyo wadarta guud ina ay tahay.
12. Fududee dooda kooxda dhex marta oo ku saabsan macanaha ku jira tirada guud ee la helay, waa kuwee siyaalaha ugu badan ee la isticmaalaa? Waayo? Sidee bay hababkaas ay isticmaalaan raad ugu yeelanaysaa caafimaadka? Sidee baa bardhigi karaa dhaqamadaas hadda hab dhaqanka xun ama wanaagsan ee aan ku ogaanay kala saar saaridda noocyada meelaha la isticmaalo marka la saxaroonayo.
13. Ha ka doodaan sida ay sawirada waraaqdu ugu taagan yihiin ama u metelayaan, ma waxaa waraaqda sawiraada ah wada sameeyay bulshada oo dhan qaybaheeda kala duwan mise si isku mid ah ayay u wada muuqataa?
14. Ha ka doodaan caqabadaha ka hor taagan ama maxay bulshadu ugu dhaqmi wayday hab dhaqanka wanaagsan ee fayodhawrka, si guud oo aan qof qof ahaan ha ula hadlin dadka waxaa laga yaabaa in aanay dadku uga hadli Karin qof qof ahaan, maxaa haboon ama wax ka tari kara?

**Fiiro gaar ah:**

Ku adkee inay dadku si daacad ah ugu ridaan meesha ku sax ah marka ay codka bixinayaan

Marka dadka bulshada horumarinteeda ka shaqeeyaa ay yimaadaan si ay u helaan oo ay u hirgeliyaan hawsha aan sawiro ku muujinta qorshaha ku samaynay, waxa ay u adeegsan karaan iyagoo isticmaalaaya sawirro kala duwan inay ku ogaadaan tusaale ahaan, waqtiga ay dadku gacmahooda ku maydhayaan saabuun iyo biyo, ama halkee bay ka soo baxaan biyaha ay dadku cabitaanka u isticmaalaan.

Hawsha 4aad: Sida xanuunku u faafo

Agabka 4aad: Dariiqyada xanuun gudbinta – Tusaha ‘F’ (Transmission routes: F-Diagram)




Ujeeddada (Purpose)

In laga caawiyo ka qayb galayaasha inay ogaadaan oo darsaan sida ay xanuunada shubanka lihi ku fidaan.




Wagtiga (Time)

1 – 1½ saacadood




Alaabda (Materials)


Waraaqo waawayn, qalimaanta waawayn ee wax lagu calaamadeeyo, xabagta waraaqaha iyo sawirro



Produced by Caritas Switzerland/Luxembourg, COOP, Oxfam GB and SCF UK



Produced by Caritas Switzerland/Luxembourg, COOP, Oxfam GB and SCF UK




Produced by Caritas Switzerland/Luxembourg, COOP, Oxfam GB and SCF UK



Produced by Caritas Switzerland/Luxembourg, COOP, Oxfam GB and SCF UK

Biyaha iyo nadaafadda guud ee deegaanku waxa ay ka ciyaaraan door aad u muhiim ah faditaanka qaar badan oo ka mid ah xanuunada la is qaadsiiyo ama mar dillaaca ee saf mareenka ah, Xanuunno badan ayaa ku faafa min qof ilaa qofka kale ama saxarada oo afka gaadha, meelaha aanay ka jirin fayadhawrka iyo nadaafadda guud ama ay ka jiraan laakiin aan la adeegsan, caruurta yaryari si gaar ah ayay khatar ugu yihiin xanuunada. Waxaa kale oo ay xanuunadu ku fidaan marka cuntada ama cabitaanka ay wasakhoobaan ama saxaradu ay gaadho. Waxaa gaadhsiin kara duqsiga inuu fayraska ka soo qaado saxarada keenta cuntada. Waxyaalaha xanuunka keena sida fayraska, jeermiska iyo ku dul noolaanshaha kale (virus, bacteria nad parasites) waxa ay sababaan ama keenaan xanuunada shubanka leh (ee ay ka mid yihiin xundhurta, daacuunka iyo taayfoodhka) xanuunadaasi waxa ay jidhka qofka ka galaan afka waxaana ay u soo dhaafaan ama ka soo raacaan iyaga oo ka mid ah saxarada (xaarka). Xaarka ilmaha yar ee aan weli socod baran waxa uu kaga badan yahay noolayaasha xanuunada keena xataa saxarada dadka waawayn.

Markaa waxaa loogu yeedhay ama magacaabay tussaha (F) waxaa uu muujinayaa dariiqooyinka kala duwan ee xanuunadu ay dadka ugu gudbaan ama u soo maraan, taasi oo macnaheedu noqonaayo; Ka bilaw (from faeces (saxarada ama xaarka) ilaa dareeraha to fluids (biyaha), fingers (faraha), flies (Duqsiga), fields (kaynta ama banaanaada lagu saxaroodo) iyo and food (cuntada) ilaa uu galo qofka cusub ee uu ku dhex noolaanaayo to the new host). Sida ay noolayaasha xanuunka keena ugu fidaan iyagoo soo raacaaya deegaanka ilaa ay gaadhaan qofka cusub, tusaale ahaan noolayaal ili ma aragtay ah oo saxarada ku jira oo dhulkaas la dhigay waxa ay si fayaw ku gaadhi kartaa biyaha kuwaasi oo ilma yari cabay, ama gacmao aan la maydhin ka dib marka qofku suuliga ka soo baxo ayaa noolahaas xanuunka keena u gudbin karaaya cuntada taasi oo uu cuni karo ilmo yar oo kale kaasi oo qaadaya shuban dabadeedna sii fidinaaya xanuunsidayaasha ili ma aragtida ah oo kasii badan intii hore.



Waxa la qabanaayo:

1. Haddii uu waqti nasasho ahi u dhexeeyay labada hawlood tan middii ka horaysay, ka bilaw in kooxdu ay ka doodaan dib u eegid waxyaalihii la soo baratay ama la go'aansaday kulamadii hore.
2. Waydii ama u sheeg ka qayb galayaasha inay isu qaybiayaan kooxo yar yar oo midkiiba 4-5 qof ka kooban yahay.
3. Sii koox kasta qayb sawirro gacmaadyada ah siina sidoo kale hawsha ay qabanayaan, sawirada mid baa muujinaaya qof meel banana ku xaaraaya, afka qof kale, u adeegso inta ka hadhay am ka dhiman sawirada in ay isku dayaan oo ay sameeyaan hababka ama dariiqooyinka kala duwan ee saxaradu ay ku soo gaadhi karto afka qofkaas, si kale haddii aan u nidhaahno, side ayay saxaradu ku gaadhi kartaa afka qofka kaasi oo markaas u bukoonaaya, waxaad ku sawiri kartaa leebab si aad u muujiso in ay taasi dhici karto.
4. Marka ay kooxuhu sameeyaan sawir gacmeedyadooda u sheeg inay u soo bandhigaan una sharxaan kooxda ka qayb galayaasha oo wada dhan.
5. Ka dooda isku mid ahaanta iyo kala duwanaanshaha u dhexeeya sawirada kala duwan.
6. Hadda u fududee dood ka caawisa kooxda inay istcmaalaan aqoonta cusub oo ay ku jarriiban ama ku eegaan xaaladooda gaarka ah, iyadoo ka doodaaya dariiqyada xanuunada la isugu gudbiyo ee bulshada dhexdeeda iyo hab dhaqanada fayo dhawrka ee khatarta ku keenaaya dadka.

TALAABADA 4AAD: Aqoonsiga xalka (*Identification of Solutions*)

Si loo qorsheeyo xal u hellidda arimaha nadaafadda guud iyo fayo dhawrka, marka laqabanayo tababarkooda waxa loo baahan yahay in la qaado talaabooyin dhawr ah.

Tallaabada koowaad waa in la ogaado dhamaan fursadaha xal u helista ee suurto gal ahaan la heli karo iyo caqabadaha hortaagan in ka hortag lagu sameeyo dariiqooyinka ay xanuunadu ku fidaan, in la isugu duba rido hawlahaas si dadku ay keligood qaban karaan iyagoo keli ahi taageero dibadeed la'aanteed.

Waxa ay tahay in bulsho ahaan la qabto ama la fuliyo iyadoo la adeegsanaayo dedaalka iyo khayraadka bulshadaas dhexdeeda laga heli karo. Habkaasi waa ka suurto galka ka dhigaaya in bulshada loo muujiyo inay hawlaha u baahan taageerada dibadeed ay yihiin wax aad u yar, waxaanay dhab ahaan la xidhiidhaan wax yaalaha aadka u sii adag sida: Dhismaha adeeg biyo gelineed ama soo saris oo cusub. Dhinaca kale marka laga eego, fulinta ama dhaqangelinta talaabooyinka lagu hagaajinaayo fayadhawrka wanaagsan iyo nadaafadda guud uma baahna taageero dibadeed oo sidaa u badan.

Hawsha 1aad: Joojinta fiditaanka xanuunka

Hawsha 2aad: Xulashada waxyaalaha caqabadaha ah

Hawsha 3aad: Xulashada hormarinta biyaha

Hawsha 4aad: Xulashada hagaajinata nadaafadda guud

Hawsha 5aad: Xulashada hagaajinta hab dhaqanka fayadhawrka qof ahaaneed, gudaha xaafadda iyo deegaanka guud ahaan

Hawsha 6aad: Waqti la isku waydiiyo suaalaha

Agabka 1aad: Xidhitaanka dariiqyada

Agabka 2aad: Qaabaynta caqabadaha jira

Agabka 3aad: Sheekada ku saabsan faraqa

Agabka 4aad: Salaanka nadaafadda guud

Agabka 5aad: Kala saarista iyo kooxaynta

Agabka 6aad: Tusaha su' aalaha

Hawsha 1aad: Joojinta fiditaanka xanuunka

Agabka 1aad: Xidhitaanka dariiqyada (*Blocking the routes*)



Ujeeddada (*Purpose*)

In la aqoonsado hawlaha la qaban karo ama talaabooyinka la qaadi karo si loo joojiyo dariiqooyinka xanuunku ugu gudbo dadka







Wagtiga (*Time*)

30 daqiiqo – 1 saac



Alaabada (*Materials*)

Sawiro dariiqyadii oo la xidhaayo, jaantuska dariiqyada xanuunku ku gudbo (oo laga soo qaatay hawlihii hore), waraaqo, qalimaan yar yar iyo waawaynba leh iyo xabagta waraaqaha



Waxa la qabanaayo:

1. Haddii uu waqti nasasho ahi u dhexeeyay labada hawlood tan middii ka horaysay, ka bilaw in kooxdu ay ka doodaan dib u eegid waxyaalihii la soo bartay ama la go'aansaday kulamadii hore.
2. U sheeg ka qayb galayaasha inay sii wadaan isla kooxihii yaryara o ay ku sii shaqeeyaan sidii hawlihii hore.
3. Sii kooxda hawlaha ay qabanayaan, hadda waxaan naqaannaa sida ay saxarada (xaarka) uu u fidinaayo xanuunka, markaas waxaan u baahanahay inaan ka fikirno maxaa laga qaban karaa si aan u joojinno inay dhacdaba ama siday u dhacaysaba., koox weliba waa inay qaadataa woxogaa sawirro ah waana in ay isku raacaan koox ahaan halka ay dhigayaan sawir qaabeedkii dariiqyada xanuunadu ugu gudbaan dadka in laga joojiyo ama laga kala gooyo dariiqooyikaas kala duwan.
4. Sodon (30) daqiiqo ka bacdi koox kastaa waa inay kooxda u bandhigaan sawir qorsheedkii ama jaantuskoodii oo dariiqyaddii iyo caqabadihii loo dhigay ama waxyaalihii joojinaayayba ay ka muuqdaan.
5. U fududee in kooxdu ay ka wada doodaan waxa ay ka barten intii hawshan lagu jiray sida su'aalo ay dhexdooda iska waydiiyaan.

Hawsha 2aad: Xulashada waxyaalaha caqabadaha ah

Agabka 2aad: Qaabaynta caqabadaha jira (*Barriers Chart*)

Tusaale:

Ka Hortagga	Hawlaha ay sisahlan bulshadu ufulin karaan taageero dibadeed la'anteed	Hawlaha u baahan kara taageero dibadeed iyo dabagal joogto ah si loo xaqiijiyo sii jiritaankooda mustaqbalka
Natiijo muuqata leh		
Aan hirgelin		



Ujeeddada (*Purpose*)

Waa in lagu sameeyo lafagurid ama daraasad sida ay hawlaha kahortaga waxku oolka ahi yihiin iyo sida ugu fudud ee ay u jiri karaan ama loo heli karo.



Waqtiga (*Time*)

30 daqiiqo – 1 saac



Alaabada (*Materials*)

Sawiradii dariiqyada xanuunku ku gudbo iyo caqabadaha loo dhigi karo tusaayay, xabagta duuban, biinan, qalimaan iyo waraqa.

Waxa la qabanaayo:

1. Kooxdu ha u qaybsanaato kooxihii yar yaraa sidii hawshii hore, sii hawsha ay qabanayaan kooxuhu, ka goo caqabadaha ama joointa loo dhigay dariiqooyinka xanuunku dadka u maro ee waraaqda ku sawiran kala saar saar adigoo ka dhigaaya qaar “aad wax tar u leh: iyo kuwa aan “wax tar lahayn”, sidoo kale mid kasta oo ka mid ah inay tahay :mid si sahlan” loo samayn karo taageero dibadeed la’aanteed, ama inay tahay “mid adag” oo u baahan taageero dibadeed. Dhig markaas mid waliba halka ay ku leedahay shaxda tusan, (tus shaxda tusaha una sharax kooxda
2. Marka ay hawshaasi dhamaato waydii kooxda inay ka wada qaybgalaan oo ku laabtaan waraaqahooda sawirada leh oo doodaan dhexdooda taasi oo ku saabsan – Wadiiqooyinka Kahortagga ee ugu fiican oo kooxdu ay rabaan ama ugu haboon inay ku isticmaalaan bulshadooda? Ku dhaqanka iyo fulinta ama qabashada ayaa wadiiqooyinka kahortagga ka dhigaaya qaar natiijo leh.



Fiiro Gaar ah:

Waxa aad waydiin kartaa ka qaybgalayaasha inay keenaan sawirro tusaalayaal ah oo lagu bedeli karo ama meteli kara ereyada aan ku soo adeegsanay, iyadoo laga yaabo inta dad badan oo bulshada ka mid ah in aanay waxba akhriyin ama qori karin.

Xubnaha bulshadu waxa ay u baahan karaan caddaymo iyo sharaxaad dheeraad ah oo ku saabsan waxa aad uga jeedo “Natiijo Muuqata” ama “aan hirgelin”, tusaale ahaan waxaad isticmaali kartaa fursadaha bulshadaas ka suurto galka ah iyo go’amada heerka qoyska ama qof ahaaneed ku salaysan ee wax taraaya sida cuntada oo la daboolo waxa ay noqon kartaa mid waxtar ah si fududna waa loo samayn karaa, dhinaca kalana kala doorashada arrimaha ah isticmaalka suuliyada iyo karkarinta biyaha waxay leeyihiin wax tar laakiin maaha qaar si sahlan loo qaban karo ilaa taageero dibadeed loo helo, gaar ahaan xagga kharashka loo baahan yahay si suuliyada loo dhiso, kaabada shubka ah iyo dhiska sareba, ama looga maarmo shaqada dheeraadka ah (xaabada lagu karkariyo biyaha la cabaayo).

Hawsha 3aad: Xulashada hormarinta biyaha

Agabka 3aad: Sheekada ku saabsan faraqa (Story with a Gap)



Ujeeddada (Purpose)

Waa in lagu hawl geliyo xubnaha bulshada ka midka ah sidii koox ahaaneed inay u qorshaystaan habka wax lagaga qabanaayo nadaafada biyaha.






Wagtiga (Time)

1 – 2 saacadood



Alaabada (Materials)

Waraqaha hawlaha la sii diyaariyay mid ka hor ah iyo mid ka dib ah sawirada biyaha la xidhiidha, markaa waxaa laga wadaa “ka hor” waa halka bulshadaasi biyaha ka helaan oo sixun loo adeegsaday, “ka dib” na waa marka la hagaajiyo ee si fiican oo nadiif ah looga faaidaystay halkii ay biyuhu ka soo baxaayeen.



Waxaa la qabanaayo

1. Hadii waqti kala go'ay sida nasasho oo kale u dhexeeyo hawshan iyo middii ka horaysay ku bilaw dood kooxda dhex marta oo ujeedadeedu ay tahay in dib loo eego waxyaalihii lagu soo bartay ama lagu go'aansaday kulamadii ka horeeyay
2. U sheeg inay ka qaybgalayaashu kooxo yaryar isu kala qaybiyaan koox yarayaal
3. U sheeg sheekada adiga oo dulucada hadalkaaga siinaaya dhibaataada aad rabto in laga hadlo
4. Sii qof kastaba in isleeg oo waraaqaha ay wixii la qaatay oo sawirada meesha ee ka hor iyo ka dib labaduba ay ku yaallaan, markaas waydii kooxaha inay dhugtaan marka ugu horaysa sawirka hawsha ka hor oo ay doodaan waayo maxay xaaladdu sidaa ugu sii xumaatay ilaa xadkaas ama heer kaas, tusaale ahaan, sawirka hore ee meel biyaha laga helo oo si aad u xun loo adeegsaday lana dayacay, waxay ka qaybgalayaashu soo jeedin karaan in meelo kale oo biyaha laga helo ay jiraan, ma jirto cid si fiican u daryeeshaa, inay dadka bulshadaasi aanay kahayn aqoon ay si wanaagsan ugu hagaajiyaan ama in aanay cidina lahayn ceelka.
5. Dabadeed waydii koox kasta in ay ka doodaan aragtida sawirka dambe ee ceelka sida wanaagsan loo nidaamiyay ama loo hagaajiyay
6. Faraqa baa jiraaya ama kala duwanaansho (gap)u dhexeeya kan hadda iyo ka la hagaajiyay kaasi oo ay tahay in la buuxiyo inta ka dhiman kan hadda. Waydii ka qayb galayaasha waxa ay la tahay in ay qabtaan ama tallaabooyinka ay tahay inay qaadaan dadka tuuladu si ay wax uga bedelaan xaaladda liidata ee tuuladooda, maxaa ka hor imanaaya ama ay caqabado ah ee ay la kulmi karaan, iyo waxyaalaha khayraadka ah ee ay u baahan yihiin
7. Ku xidhiidhi arimaha ay garteen ama sheegeen arimihii hore loogu sheegay meelaha kale ee nadafaada biyaha iyo fayodhwrka ee loo baahnaa in wax laga qabto

Hawsha 4aad: Xulashada hagaajinata nadaafadda guud

Agabka 4aad: Sallaanka nadaafadda guud (*Sanitation Ladder*)



Ujeeddada (*Purpose*)

Waa in laga caawiyo ka qayb galayaashu inay si cad u qeexaan fayadhawrka bulshada, gartaan ama sheegaan fursadaha ama hawlaha la qaban karo si wax looga qabto baahiyaha fayadhawrka oo ay daah furan ama ikhtiraacaan in hagaajinta xaaladda loo samaynaayo si tallabo tallaabo ah.




Wagtiga (*Time*)

1 – 2 saacadood




Alaabada (*Materials*)

Dhawr qaybood oo sawirro sallaanka nadaafadda guud oo laga soo qaatat qalabka hawfududaynta ee PHAST, waraaqo balbalaadhan oo sawir gacmeedyada ku filaan karaya (waa wax haddi la doono ah), iyo xabagta gidaarka wax loogu dhejiyo



Produced by Caritas Switzerland/Luxembourg, COOPI, Oxfam GB and SCF UK



Produced by Caritas Switzerland/Luxembourg, COOPI, Oxfam GB and SCF UK

Waxa la qabanaayo

1. Hadii waqti kala go'ay sida nasasho oo kale u dhexeeyo hawshan iyo middii ka haraysay ku bilaw dood kooxda dhex marta oo ujeedadeedu ay tahay in dib loo eego waxyaalihii lagu soo bartay ama lagu go'aansaday kulamadii ka horeeyay
2. U sheeg inay ka qaybgalayaashu kooxo yaryar isu kala qaybiyaan koox yarayaal midkiiba 5-8 qof yahay
3. Sii kooxaha hawsha ay qabanayaan, adiga oo adeegsanaaya kalimaadkan, koox waliba waxa ay helaysaa xidhmi fursado la qaadi karo oo nadaafadda guud ah. Eeg fursadaha ama kala doorashada iskuna hagaaji si aad sidii salaanka oo kale aad uga samayso, adiga oo ka bilaabayaa ta aad is leedahay way ugu liidataa hoosta mida aad u tixgeliso inay ugu wanaagsan tahayna ku soo dhamaynaaya isa saar saarista oo dusha ugu saraysa dhigaaya
4. Sii koox kasta in is le'eg oo sawirro ah
5. waxaa faaiido yeelan karta haddii aad haysato woxoogaa waraaqo ah iyo qalimaan, sidaa darteed ay ka qayb galayaashu sawiri karaan, habkii ama dariiqadii kale ee ay la tahay ama ay doonayaan inay ku kordhiyaan laakiin waa kuwa aan inta aan haysanno ku jirin
6. Sii kooxda waqti ilaa 20 daqiiqo ah oo ay salaamkooda ku sameeyaan. Dabadeed u tag koox kasta oo sii hawsha taa ku xigta: "Hadda waa inaad go'aansataa meesha ay bulshadu hadda marayaan iyo halka aad doonaysid inay gaadhan muddo sanad ah oo hadda ka bilaabanta. Ka doodaan waxyaalaha kuu fududeeyay ama kugu adkaa intii aad salaanka jaran jaraooyinkiisa kala sarreeya aad samaynaysay"
7. Marka ay kooxdu dhameeyaan hawshan, waydii in koox waliba ay u sharaxdo salaamkooda ka qaybgalayaasha oo dhan
8. ka dib sharraxaadana waa inaad ku dhiirigelisaa kooxda inay ka doodaan arimahan:
 - isku mid ahaanta ama kala duwanaanta sida ay kooxuhu u kala dooranaayeen jarjarada salaanka isku hagaajinteeda
 - isku mid ahaanta ama kala duwanaanta halka ay kooxuhu kala dhigeen meesha ay hadda bulshadani marayso iyo mustaqbalka
 - fursadaha ama talaaboouinka ay bixiyeen inay yihiin kuwa ugu fiican ee la qaadi karo bulsho ahaan
 - faa'iidada arin ama fursad kastaa ay leedahay
 - dhibaatooyinka ama caqabadaha kaa hor yimi ama aad la kulantay intii aad salaanka soo fuulaysay
 - side baa go'aanadaas loo gaadhay
 - waa maxay warbixinta ama war nooc ee ah ayaa kooxa ku ay fekerayaan ama ay la tahay in loo baahan karo is ay u suurto gasho in si sax ah la isu barbar dhigo fursadaha jiri kara
9. Ku dhiirigeli kooxda in ay ku heshiiyaan ha lama mid keliya oo salaanka nadaafadda guud ah
10. U sharrax kooxda in hawsha tan ku xigtaa ay inaga caawin doonto in aan samaysanno qorshe hawleed ka bilaabma halka aan hadda joogno ama sida ay xaaladda ama xaaladaha nadaafadda guud aan doonayno inay noqdaan mustaqbalka



Fiiro- gaar ah:

1. Ka hor inta aanad bilaabin hawsha waa ay ku caawinaysaa haddii aad hayso warbixino ku saabsan:

- Qaabka mabda'a ahaaneed ee fursadaha fayadhawrka ee kala duduwan.
- Waxtarnimada dhab ahaan ay yeelan karaan talaabooyinkaasi.
- Dhaqan gelinta iyo adeegga joogtada ah ee ay u baahan karto mid kasta oo ka mid ah talaabooyinka la qaadi karo.

- Kharashka ku baxaaya talaabooyinkaas kala duwani.
- Kharashka ay ku kacayso dhaqangelinta iyo joogtaynta.
- Taageerada la heli karo.
- Mudada uu qaab dhismeedku socon karo iyo sii jiritaanka nidaamka.

2. Salaanka fayadhawrka waxa uu tusayaa in hagaajinta lagu samayn karo talaabo talaabo. Fikradda ay bulshadu ku horemarin karto salaanka heererkiisa kala duwan waxa ay noqon kartaa mid soo jiidata oo ay ay xiisaynayaan kooxuhu. Waxaa ay rumaysanayaan in is bedelka lagu samayn karo in muddo ah, kaasi oo xagga dhaqsaha ku haboon oo ay maamuli karaan iyagu. Marka ay kooxuhu taa ogaadaan waxa ay ku dhiirigelin kartaa inay ahaadaan kuwu aad uga qaybgalay.

3. Marka lakala dooranaayo talaabooyinka ama fursadaha la qaadi karo waxaa aad u muhiim ah in la tixgeliyo inta qiyaasta biyo ah ee talaabo kastaba looga baahan doono. Khatarta wasakhaynta deegaanka iyo khayraadka biyaha ee jira labdaba waa in la tixgelyaa. Hubi in ka qayb galayaashu ay ka doodaan arimahan.

4. Ku hay maankaaga in fikradda talaabooyinka soconaaya ee isku xig xigaa iyo doorashada ama u xulashada dhinaca mustaqabalka ay ka muhiimsan yihiin qaabka salaanka.

Hawsha 5aad: Xulashada hagaajinta hab dhaqanka Nadaafada shaqsiya/dadka, gudaha xaafadda iyo deegaanka guud ahaan

Agabka 5aad: Kala saarista iyo kooxaynta (3 Pile Sorting)



Ujeeddada (Purpose)

In laga caawiyo kooxda inay gartaan dhaqamada nadaafada ee: la rabo in la bedelo, la doonaayo in la sii hirgeliyo iyo in dib u sii xoojin lagu sameeyo iyo kuwa la doonaayo in bulshada la baro.




Wagtiga (Time)

1 saac



Alaabada (Materials)

Qaybo ama meelo lagu kal saar saaro sawirada la adeegsaday talaabada 3aad ee Hawsha 2aad.



Waxa la qabanaayo:

1. Hadii waqti kala go'ay sida nasasho oo kale u dhexeeyo hawshan iyo middii ka haraysay ku bilaw dood kooxda dhex marta oo ujeedadeedu ay tahay in dib loo eego waxyaalihii lagu soo bartay ama lagu go'aansaday kulamadii ka horeeyay
2. U sheeg inay ka qaybgalayaashu kooxo yaryar isu kala qaybiyaan koox yarayaal midkiiba 5-8 qof yahay
3. Sii hawsha kooxaha adigoo odhanaaya ereyadan: ka soo dhex doorta saddexdaa qaybood ee sawirada ah mid ama in ka badan oo hab dhaqan nadaafadeed ah kaasi oo aad raacsan tahay in ay wax caafimaadka ku xun tahay in la joojiyona loo baahan yahay.
4. Sii kooxaha waqti ilaa 20 daqiiqo ah si ay u soo xulaan hab dhaqanadooda faya-dhawrka. Dabadeed waydii koox kasta inay kooxda oo dhan u sharaxdo xulahsadooda hab dhaqanka fayadhawrka
5. Fududee dood kooxeed ujeedadeedu ay tahay:
 - in la gaadho hashiis la isku wada raaco ka wanaagsan ama ka xun hab dhaqanadaas ee ay aad ugu muhiimka tahay in laga shaqeeyaa
 - side ayay bulshada raad ugu yeelanaysaa haddii ay sameeyaan ama ku dhaqmaan hab dhaqanka wanaagsan waqti kasta, inay aqbalaan hab dhaqanada cusub, iyo inay bedelaan dhaqamada xun xun



Fiiro gaar ah:

1. Waaya aragnimada hore ayaa muujinaaya in marka barnaamijka wada socda ee isugu jira labadaba hab dhaqanka faya-dhawrka ee bulshada oo wax laga bedelo iyo adeegga nadaafadda guud oo la hagaajiyaa ay ka waxtar badan tahay dhinaca xakamaynta xanuunada shubanka keena marka loo eego kuwa keliya ku kooban hab dhaqanka bulshada wax ka bedelkiisa ama adeegyada. Waxaa jira inta badan u sii nuglaan loo sii leexdo oo muhiimadda la siinaayo dhismayaasha iyo qalabka adeegga muuqda ee meeshaas ka jira. Sidaa darteed waxa ay hawshani ujeedadeedu tahay in la xaqiijiyo inaan doorka hab dhaqanka bulshadu aanu ahayn mid la iska indha tiri karo.
2. Sidee ayaa loo barayaa hab dhaqanada cusub ee faya-dhawrka ama loo wajahyayaa sidii loo sii xoojin karaa kuwii hore u sii jiray. “Talaabada 5aad ayaa ah qorshaynta adeegyada cusub iyo bedelaadda hab dhaqanka”.

Hawsha 6aad: Waqti la isku waydiiyo su, aalaha

Agabka 6aad: Tusaha su' aalaha (*Question Box*)



Ujeeddada (*Purpose*)

In la siiyo ka qaybgalayaasha fursad ay ku waydiiyaan wixii su'aalo ah ee ku saabsan sida ay hawluhu u soo socdeen ama waxyaalo kale, si loo helo war bixin ama jawaab celinta ka qayb galayaasha kale, iyo inay ka caawiso kooxda inay aqoonsadaan qiimaha aqoonta iyo warbixinha ay leedahay wadajirka ama isu imaatinka



Wagtiga (*Time*)

1 – 2 saacadod



Alaabta (*Materials*)

Kaadhadh ama waraaqo qalimaan, weel wax qaada sida (sellad ama koofiyad iyo sanduuq)

Waxa la qabanaayo:

1. Haddii waqti kala go'ay sida nasasho oo kale u dhexeeyo hawshan iyo middii ka haraysay ku bilaw dood kooxda dhex marta oo ujeedadeedu ay tahay in dib loo eego waxyaalihii lagu soo bartay ama lagu go'aansaday kulamadii ka horeeyay
2. Hawshan waxaa si fiican loogu qaban karaa sidii hal koox oo wayn, tirade dadka la siinayaa waa in aanay ka badan ilaa 40 qof
3. Sii kooxda shaqada ay qabanayaan adiga oo u sheegaaya " mid kasta oo idinka mid min fadlakum ma ku qori karaa waraaq yar ama ma ku muujin karaa sawir su'aasha uu doonaayo ama jeclaan lahaa in looga jawaabo, marka aad su'aashaada qorto ama aad sawirto isku laab waraaqda"
haddii qaar ka mid ah ka qayb galayaashu aanay wax qori Karin, waydii qof kastaa inuu ka fekeri su'aasha dabadeed uu lu calaamadeeyo waraaqda. Marka qaraaq qof soo calaamadeeyay ama midabeeyay aad soo qaado ayay su'aashooda kor ugu dhawaaqi karaan, waa maxay habkaasi, su'aaluhu maaha inay isku wada magac ahaadaan laakiin qof kastaa wuu ka qayb geli karaa.
4. Waydii ka qayb galayaasha inay dhamaan suaalaha ku soo guraan meel, taasi oo noqonaysa sanduuqii su'aalaha
5. Marka su'aalaha oo dhamaa ay noqdaan kuwo la soo ururiyay, u dhaaf sanduuqa suaalaha qof ka mid ah dadka, ha la dhex qaado kooxda oo dhan ama iyaguba ha soo kacaan waa in qof kastaa kala baxaa hal waraaq oo ay ku qoran tahay su'aali akhriyaa su'aasha kana jawaabaa isla isagu, haddii uu qof la baxo su'aashii, waa inay waydiistaan in loo badalo oo ay mid kale qaataan
6. Haddii ka qayngalayashu aanay ka jawaabi karin suaalaha mid ka mid ah, ku dhiirigeli qof kale oo kooxda ka mid ah inuu ka jawaabo



Fiiro gaar ah:

1. Hawshani waxa ay caawin kartaa in ay xasuusiso kooxda in aan loo baahnayn in wax badan dibadda laga doono khubaro ka baxsani aanay jirin, marka la isu wada geeyo waxa ay keenaysaa dhamaan warbixinihii iyo aqoontii loo baahnaa.
2. Qaar ka mid ah su'aalaha ayaa noqon kara luwo aan xidhiidh la lahayn mawduuca laga hadlaayo, laakiin lagama saari karo gooni haan, waxa ay tilmaami karaan sida kala duwanaanta ay ugu jirto waxa la kala danaynaayo, waxa ay sidoo kale iska noqon kartaa iska qalad hadana wax tar leh.

TALAABADA 5AAD: Qorshaynta meelmarinta iyo isbadalada (*Planning for Implementation and Change*)

Talaabadani 5aad waxa ay leedahay 4 hawlood oo la qabanaayo:

- 1.Hawsha 1aad: Hawlaha cayiman ee ay kala qabanayaan raga iyo dumarka bulshadu** waxa ay ka caawinaysaa kooxda qorshe u samaynta hawlaha iyo talaabooyinka la qaadaayo si loo fuliyo xal u helistii hore loo go'aansaday
- 2.Hawsha 2aad: Xulashaada cida ka faa'idey** waxa ay awood u siinaysaa kooxda inay sii saadaaliyaan dhibaatooyinka iyo hababka qorshahan lagaga bixi karo
- 3.Hawsha 3aad: Qorshaynta hormarinta bulshada** waxa ay ka caawinaysaa kooxda in cid xil ama masuuliyad loo magacaabo hawl kasta iyo iyo talaabo kasta
- 4.Hawsha 4aad: In la ogaado wixii qaladaad ah ee dhici kara** Kooxdu waa in ay awood u yeelato ayna saadaalin karto dhibaatooyinka ku soo wajahan isla mar ahaantaana ay uga guulaysan lahaayeen dhibaatooyinkaas

Agabka 1aad: Daraasad doorka iyo kala lahaanshaha hawlaha ee lab iyo dhedig


Agabka 2aad: Heerarka darajo ee hantiyeed

Agabka 3aad: Qorsheynta qoraalada wacyigelinta

Agabka 4aad: Tusaha dhibaataada

Hawsha 1aad: Hawlaha cayiman ee ay kala qabanayaan raga iyo dumarka bulshadu

Agabka 1aad: Daraasad doorka iyo kala lahaanshaha hawlaha ee lab iyo dhedig (*Gender Role Analysis*)



Ujeeddada (*Purpose*)

- In la sameeyo wacyi gelin iyo fahamsiinta bulshada oo dhan in dadka guryaha ku nool ay gartaan in ay door ku leeyihiin hawlaha bulshada taasi oo wixii ragga iyo dumarkuba ay ka qabtaan midba uu ka kale door ku leeyay
- Iyo in la isla garto haddii ay suurto gal tahay ama ay wanaagsanaan lahayd in wax isbedel ah lagu samayn karo sida hawlaha loo kala meeleeay.






Wagtiga (*Time*)

1 Saac



Alaabada (*Materials*)

Saddex (3) sawir oo kala duwan oo waawayn oo ah, Nin naag, Nin iyo naag wada jira, 12 ama in ka badan oohawl sawirro ah, qalimmo iyo waraqa.



Waxa la qabanaayo:

1. Haddii uu waqti nasasho ahi u dhexeeyay labada hawlood tan middii ka horaysay, ka bilaw in kooxdu ay ka doodaan dib u eegid waxyaalihii la soo baray ama la go'aansaday kulamadii hore.
2. Waydiiso ka qaybgalayaasha inay isu qaybiyaan kooxo midkiiba 5-8 qof ka kooban yahay.
3. Adigoo adeegsanaaya ereyada soo socda, waydiiso ka qaybgalayaasha inay hawlaha qabtaan
koox kastaaba waxaad siinaysaa sawir nin, mid naag iyo mid labadaba ah, waxaanad u samaynaysaa dhawr hawlood oo kala duwan oo la iriira meel marinta iyo maareynta fayowdhawrka caadooyinka iyo dhaqanka horumarinta koox kasta, kooxdaa dhexdeeda ka doodaya kumaa hawshan qabanaaya, marka la isku raaco, dhig sawirada hawsha tilmaamaya sawirka ninka, ama ka naagta ama ka labada qof hoostiisa iyadoo ku salaysan kolba waxa aad go'aansateen, sawirka labada qof ee ninka iyo naagta waxa uu muujinayaa inay raga iyo dumarkuba hawsha wada qabanayaan.
4. Kooxda u ogolow inay hawshooda qabsadaan iyo inay ka doodaan natiijada uga soo baxa hawshooda, waa inaad waraago banaan siisaa si hawsha loo fuliyo .
5. Marka hawsha la qabanayaa ay dhamaato, waydii in koox kastaaba inay u sharaxdo oo u soo bandhigto ka qayb galayaasha waxa ay koox ahaan doorteen, sharax doorahsadooda ka jawaabna wixii suaalo ah.
6. U fududee dood kooxda dhexmarta si ay uga doodaan arimahan
 - waa maxay hawsha, yaa qabanaaya
 - shaqada dheeriga ah ee saran raggga iyo dumarka, sidoo kale xilliyada abaarta iyo roobabka
 - side ayay shaqada dheeriga ah ee saarani kala duwanaasho ahaan ugu yeelanaysaa raad shaqada lagu dhamaynaayo xanuunada shubanka ee iman doona
 - faa'iidada ama qasaaraha haddii dumarka iyo raga shaqadooda loo kala bedelo
 - awood u helista haddii hawlaha raga iyo kuwa dumarka la isku bedelo
 - Awooda waxqabad ee wax lagaga bedeli karo hawlaha ragga iyo dumarku kala qabtaan ee ku saabsan Biyaha, Nadaafada iyo Fayodhowrka
7. Waydii kooxda inay gartaan doorka ay tahay in wax laga bedelo so loo kordhiyo ama loo hagaajiyo xaaladda fayadhawrka iyo nadaafadda guud ee bulshada, iyo in la diiwaan geliyo ama la qoro waxyaalahan gabgabada ah si hadhaw kormeer ama qiimayn dabagal ah loogu sameeyo waqti kale ama dambe.
8. U fududee kooxda inay ka doodaan maxaan ka baranay hawshan, maxay jeclaadeen ama aanay jeclaysan intii ay hawshani socotay.



Fiiro gaar ah:

1. Inta ay hawshani socotay waxa ay raggu mararka qaarkood ku caban karaan in sawiradoodii hawshooda ku jiray aanay ka mid ahayn kuwa la qaatay. Taasi sababteedu waxaa weeye kuwaan qaadanaay waxa ay ku wajahan yihiin inta badan hawlaha la xidhiidha nadaafada guriga iyo bulshada iyo nadaafada guud, inta badan bulshooyinkana hawlahaas waxaa qabta haweenka. Haddii taasi dhacdo waxaad waydiin kartaa inay sawiraan hawlaha ay iyagu qabanayaan oo ay ku daraan hawlaha.
2. Kooxdu waxa ay soo jeedin karaan in 3da sawir ee ninka iyo naagta oo keli keli iyo kan labadoodaba kuwada jiraan aanay ku filnayn, oo markaas ay yidhaahdaan ku dar wiilasha iyo gabdhaha, waa si wanaagsan, laakiin waxaan daraasadaynaynaa waa doorka lab iyo dhedig ee ma aha da'da.

Howsha 2aad: Xulashada cida ka faa'idey

Agabka 2aad: Heerarka hantiyeed (*Wealth Ranking*)



Ujeedada (*Purpose*):

- In ladaba galo fikradaha hantida iyo farqiga u dhaxeeye isla sinaansho darada eee kajira bulshada.
- Waa in la cadeeya lana fahmaa tikmaamid caadi ah hantida iyo maslaxada bulshada.
- Waa i naad sawirtaa fadhiyada la kal heysto ee dhamaan xaafadaha bulshada walina aasaas xubnaha ee bulshada kamid ah ayaa ah kuwa sida fiican uga faa iida fara galinta qorshaha.



Waqtiga (*Time*)

2 – 3 saacadood



Allaabta (*Materials*)

Qalimaan iyo kaarar

Waxaa la qabanaayo:

1. Ka dhaadhici kooxda habka lagu la soo baxayo dadka macaawinada istaahila, talaabada 1^{aad} waxay noqon donto in aad cadaysid kuwa ugu faqiirsan bulshada ee sida toos ka ah uga faa'idayo maalgalinta.
2. U sharax kooxda in hormarkooda howlaha ay bar tilmaamayd u noqonayaan dhanka faqriga uu ka jiro ee bulshada maadma ay kuwani yihiin dadka ugu daran xaga rafaadka bulshada ee aan iyagu lahayn awooda ay ku maarayn lahaayeen noloshooda tani ayaa lagu fulin karaa adiga oo f ududeenaayo kooxda oo dhan in ay kawada xaajoodaan faqrinimada iyo astaamaha lagu yaaqaano kuwa sida ba'an uliita oo baahida heysa.
3. Marka xigta sii ka qeyb galayaasha xoogaa kaarar ah oo ay kujiraan magacyadii ee guri kasto ee xaafada waydiina in ay kus hagaajiyaan kaararka kooxokooxo ee isku mid ah dhinaca hantida.
4. Kadib waydii kooxda in ay soocaan kaaraka magacayda ee guriyo kale duwan (ayna ugu yar yihiin afar) si ay u kala cadeeyaan yaa faqri ah iyo yaaba ka daran.
5. Bilaw wada xaajoodka adiga oo waydiinaayo kaqybgalayaasha in ay sharaxaan farqiga u dhaxeeya kooxada hantida. Tani yaa loo sameeyaa si guud ahaeend balse ayaan loo eegi hal guri oo kali ah.
6. Howl fur furyaasha waa in ay ogaadaan ayan ka saaraan Pile kaste ee laga wada xaajooday, kooxada waa inay dib u eegto sifiican u fiiriso cilmiga ee u lee yahiin hantada dada qofka ka shaqeeya dagana hal Ixaafad oo kali ah sidoo kale bulshooyin kale gedisn ayaa leh fikir u qaas ah.



Fiiro gaar ah:

1. Darajada hantida sidaa darteed ayaa cawisa in ay keeto adkaansho iyo dhab ahaansho ee hantid aiyo faqrinimada
2. Muraajacada darada hantida ayaa waxaa koo is ticmaali karaa bulshada hoose iyo kuwa xaafadaha la sima ayaga ee dhinaca hantida. Qaabeynta ayaa go'aamiso sida loo qayaxo hantida iyo darajooyinka hanitad

Hawsha 3aad: Qorshaynta hormarinta bulshada (Community Action Plan)

Agabka 3aad: Qorshaynta qoraalada wacyigelinta (Planning Posters)



Ujeeddada (Purpose)

In ay awood u siiso ka qayb galayaasha inay samaystaan qorshe, si ay u gaaraan kuna shaqeeyaan oo ay fuliyaan is bedel dhab ah oo hab dhaqanka bulshada ee dhinaca fayd dhawrka iyo nadaafadda guud ah la sameeyo.



Waqtiga (Time)

3 – 4 saac



Alaabta (Materials)

Xidhmo waraaqaha qorshaha ah, talaabooyinka hadda iyo mustaqbalka la qaadi karo, (ka soo qaado talaabada 4aad, hawlaha 1, 2, iyo 3) xabagta gidaarka, qalimaan iyo waraaqo

Tusaale Qorsheenta ficilka ee Bulshada

Dhibaatooyinka fara galinta: {ciwan}				
Hadafka 1:				
Hawsha xigta	Qayradka	Mus'uuliyadaha		Qabeynta Waqtiga
		Bulshada	Hay'ada	
Hadafka 2:				
Hawsha xigta	Qayradka	Mus'uuliyadaha		Qabeynta Waqtiga
		Bulshada	Hay'ada	

Waxa la qabanaayo:

1. Hadii waqti kala go'ay sida nasasho oo kale u dhexeeyo hawshan iyo middii ka haraysay ku bilaw dood kooxda dhex marta oo ujeedadeedu ay tahay in dib loo eego waxyaalihii lagu soo bartay ama lagu go'aansaday kulamadii ka horeeyay
2. Dhig sawiradii arimaha la qaban karo ama fursadah dhinaca hagaajinta biyaha nadaafadda giid iyo hab dhaqanka fayadhawrka ku saabsanaa ee talaabda 4aad giddarka ku muuji.waxyaalaha hadda waqtigan la joogo iyo mutaqbalka sawiradu waxa ay muujinayaan bedelada dhinaca adeegyada iyo hab dhaqanka labadaba, sidii ay kooxdu u sheegeen markii lagu jiray talaabada 4aad ee la adeegsanaayay sheekada farqiga (gap) ka u dhexeeya, salaankii nadaafadda guud iyo kala saarsaariddii sawirada lagu muujinaayay ee saddexda qaybood.
3. Waydii ka qayb galayaasha inay u wada shaqeeyaan kooxo yer yar oo midkiiba ilaa 5 – 8 qof ka kooban yahay, sii hawlaha ay qabanayaan ka qayb galaayaasha adigoo ku odhanaaya: “miyaa ku raacsan tihiin sida ay koodu yidhaahdeen arimaha la qaban karo ama fursadha markii ay tilmaamayeen waxa ay u tixgeliyeed inay dhibaato guud oo caam yeshay ka tahay bulshdiinna dhexdeeda hadda xilligan la joogo?” sidoo kale arinta mustaqbalka ee kooxda sida ay u arkayeen inay tahay sida aan jecelahay inay ahaati miyaa iyadana ku raacsan tihiin?”
 - Hadaba aan ogaano waxyaalaha loo baahan yahay in la sameeyo si aan uga dhaqaaqno halka waqtigan xaadirka ah xaaladda taagan ilaa halka aynu doonayno inaan gaadhno. Si taa loo qabto waxaan u baahanahay in samaysanno qorshe si aan u buuxinno farqiga u dhexeeya (gap)ka aniga oo idinka ccawinaaya sidii aan u samayn lahayn, koox kastaa waxa ay haysata xidhmo waraaqaha gidaarka ah oo ay ku yaalaan qaar ka mid ah talaabooyinka loo baahan karo habi koox kastaa waa inay eegaan waraaqaha qorshaha lagu sameeyo waana in ay isugu hagaajiyaan sida ay kula tahay inay ku eeni karaan halka aan doonayno inaan gaadhno si wax tar leh.
 - Adeegso waraaqaha banana si aad ugu sawirto wixii talaabooyin dheeraad ah ee aad jeceshahay inaad ku darto
4. Sii koox kastaba in is le'eg oo waxyaalaha fursadaha ah ee hadda iyo mustaqbalkaba la qaadi karo ama ay tahay in la qabti si meesha la higsanaayo loo gaaadho ah iyo waraaqaha qorshaha lagu sameeyaba ama hadii kale waxad uqeybin kartaa kooxda sawiro kusaabsan kooxda (1aad) Sawir biyoo kusaabsan, kooxda (2aad) Sawir fay dhowrka ugu dhambeysi Kooxda (3aad) sawir nadafada guud ah.
5. Sii kooxaha waqti ilaa 30 daqiiqo ah, ilaa 1 saacad oo ay isku hagaajinta talaabooyinka la qaadi karo kaga shaqeeyaan. Dabadeed waydii koox kasta Inay sharaxaan qorshahooda dadka hortiiisa. Koox kastaa waa inay isu soo diyaarisaa inay ka jawaabaan su'aalaha gaarka ah ee la waydiiyo, in kastoo doodaha guud iyo muranku ay ahaadaan qaar xaddidan ilaa koox kastaaba ay soo bandhigto hawsha ay qabteen.
6. Sharaxaadda kooxaha ka dib u fududee inay kooxdu ka doodaan iyadoo ujeedadu tahay in la gaadho heshiis ku saabsan qorshaha guud. Doodahaasi waa inay ka jawaabaan:

- Waxyaalaha ay iskaga mid ka yihiin ama ku kala duwan yihiin tallaabooyinka ay koox waliba dooratay iyo sida ay isugu xig xigaan.
 - Dhibaatooyinka soo bixi kara marka la isku dayo in talaabooyinkaas la qado.
 - Waqtga looga baahan yahay in talaabooyinkaas lagu qaado.
 - Xaqiijiso in ay bulshadu kasta ka hergeshey howlahaan so sameeyne ee xulashada ciida ka faa'ideeyn
7. Marka xiga qorshee sawiro aad dhigayso-kuwaasoo ay kooxdu ku heshiisay in ay soo bandhigaan qorshaha talaabooyinka- ayna darbiga ku soo dhajiyaan hal layn oo vgudban sidii ay kooxdaasi ugu heshiiyeen.
 8. Sii kooxda hawl adigoo isticmaalaya ereyadani: “adigoo qorshaynaya sawirada[fartana ugu fiiqaya] tus talaabooyinka aad go'aansatey in aad dhex dhigto ficilka qorshaha. Hada waxaad u baahantahay in aad go;aansato qofkii qaadi lahaa talaabooyinkani. Si wada jir ah uga wada xaajoda talaabo kasta iyo nooc kasta ba tayada iyo xirfada shaqsi ahaaneed ee loo baahan yahay in lagu fuliyo. Go;aanso qofkii fulin lahaa talaabo kasta. Marka aad go;aansato qofkii masuulka ahaa iyo waxa, ku qor magacyada gobol warqad ah ama kaar adigoo ku qoraya wixii magac nin ah hl midab sidoo kale wixii magac dumar ku qor hal midab.ka dib ku dhaji gobol kastoo warqad ah ama kaar ah sawiradii darbigeed qorshaysay hoostooda.
 9. Adigoo eegaaya wada sheekaysigii hore iyo dhameystirkii aad gaarteen xiligii lagu jirey hawsha dumarka iyo raga ee bulshada, martigali kooxda si ay dib ugu eegaan howshii la qoondeeye ayada oo la fiirinaayo sameynta ay ku yeelatay raga howshooda sidoo kalena dumarka, samee hada adiga oo isku xiraya labada howlood xiliga hadii ay rajeneyso.
 10. Markii howlaha la qoondeeye, waydii xooxada in ay kawada xaajoodaan iskuna raacaan qofka ka la wadi doono howsha iyo talaaboyinka qorshaha. Qor magaca ama magacyada xiriiriyaasha ku dhagi dusha sare ee sawiradii la qorsheenayo.
 11. Marti gali qofka ama dadka la xushay si ay u wadaan una xariiriyaan inta ka dhiman shirka. Tani waxay dhameystiraysaa xiligii horumaraye dhameystirayena wax kasta ee qorsha ah.
 12. Waydii kooxda in ay kawada xaajoogada isku na raacaan cadada waqtiga ee talaabo kaste ay ku dhamaan karto, kuna kaydi waxbixinada dusha sawirada qorsheenta.
 13. Fududee xaajoodka sida tan:
 - Muhimmada oo aad ku baadi goobesyid in la dhameystiray shayadii xiligii logu talagalay.
 - Sida kooxada ay u eegto in ka qeybgalaysha ay sameynayaan wax ay ka mas'uul yahiin.



Fiiro-gaar ah:

1. Diyaar u ahaw qabashada hawshan qorshaynta ah ee dhamaan is bedellada iyo adeegyada si loo hagaajiyo nidaamada jira iyo isbedelka hab dhaqanka bulshada ee la higsanaayo, doorkaagu waa inaad caawiso kooxda una fududaysa habka loo maraayo inay noqdaan kuwo la maamuli karo.
2. Ha ka walwalin haddii kooxdu aanay doonayn inay qorshe u samaystaan ay ku bartaab dhamaan is bedelada la isla gartay. Xilligan waa ay ku filan tahay inay doonaan ama rabitaankooda inay qorshe u samaystaan ay ku baranayaan qaar ka mid ah isbedellada. Marka kuwaasi ay si fiican u bartaan natiijadu waxa ay ku dhiiri gelin doontaa kooxda inay hawshooda wadaan oo ay sii qorsheeyaan is bedelada kale. Qaybta yare e qorshaha ka mid ka ah ee ay qaar ka mid ah kooxdu diyaarka u noqdeen ayaa sida la rabo uga faa'iido badan qorshe balaadhan oo aan taageero fiican haysan.
3. Khariiraddii asalka ahayd ee bulshada ama tuulada ayaa loo adeegsan karaa inay ka caawiso kooxda ka fikirka dhinaca natiijada kama dambaysta ah ee ka soo bixi doonta ama raadka uu dadka ku yeelan doono mudada fog is bedelka qorshihiisa la barayaa. Dodoo ayaa ka soo bixi kara ama suaalo ayaa la iska waydiin karaa ku saabsan yaa masuul ka ah qabashada qaybo gaar ah oo ka mid ah qorshaha. Qorshaha yaa qabanaaya, maxaa la qabanayaa. Hawsha tan ku xigta ayaa ka caawin doonta kooxaha inay magacaabaan ama cid ku qaabeeyaan masuuliyadaha hawlaha si sax ah taasi oo hawlahu ay noqon doonaan qaar si sax ah loo qabto waqtiga ku haboon.
4. Hala yaabin hadii inta lagu guda jiro muraajacad qorshaha lagu daro talaabooyin kale oo dheeraad ah, marka ay dadka ay noqdaan kuwa ka war haya waxa ay sameynayaan, ayada ayaa waxaa ay bilaabi doonaan in ay sifiican u fakiraan kadibna ay si taxadar leh ay u eegaan howsha ay qabanayaan.
5. Hadii uu kooxada ay ka caajisantahay in ay aqbasho masuuliyada iyo meel dhigida ee inta badan ee howsha, ayaad waxaa u baah naan dootaa in aad eegto:
 - Maxaan loo diyarin inla qaado mas'uuliyadasi.
 - Hadii ay tahay wax la rumeysan yahay faydhowrka ama nadaafada ay tahay dhibaato, hadii ay sidasi tahay qorshaaani in uu caawin doo ka guuleysiga dhibaatooyinka.
 - Maxay matalayasha ee kooxdaan dibada loogu dari waayey in ay ka noqdaan ka qeygalayaal.
 - Sidee kaqeyb gal ee banaanka ah loo martigali wayeey si uu kooxda uga mid noqdo.
 - Hadii ka qeyb galayashaani dibada ka yimid ay xil qaadmaan sida loo fulin lahaa qorshaha ma aysan caawin sidii loo hormarin lahaa qorshaha.
 - Hadii qorshahaan u shaqeeyo sida loo baahnaa ee howsha la qorsheeye.
6. Go'aanso qofka qaban doono wax noqon karo waqti lumis, howshani waxaa laqaban karaa xiliyo fara badan oo isku xig xiga si loo hubiyo waqti ku filan ee wadaxaajod ah.
7. Hadii aysan jirin wada wanaagsan oo kooxada aysan ku fulin Karin howsha islamarkanina aysan qoondaynkarin. Waxaa muhiim ah in aad maskaxad ku heysid in aad isticmaashid kudhaqanka caadiga ah ee loo isticmaalay howlaha layliga ee dadka. Xulashada yeysan ku saleynanin oo kali ah waa la xiiseeyaa ama waa can.
8. Waa in aad soo geedisaa kuwii aad xulatay in la waydiiyo hadii ay u fakireen in ay yihiin kuwii saxda ahaa ee howsha qaban lahaa. Ku dhiiri gali kooxda in ay ku guuleystaan. Dhinac kaste ee bulshada (iyada oo loo eegayo Da', sinjiyad, asal, diin, wax barasho, iyo waxyaalo kale oo fara badan oo laga helo bulshada) xiliga aad sameyneysid xulashadooda.

9. Ka caawi kooxda adiga oo xasusinaya in ay sameeyaan qorshaha howlaha ee xiliyada barashada caafimaad, ayaa ah mid muhiim ah sida loo qorsheenayao isbadalada muuqaalk ah aasaasida suuliyada cusub.
10. Haka wal wal in hadii kooxada aysan dhameystirin shaxda howsha ayan doonayaa in ay iska tagaan, qorshooyin kale ilaa iyo xiliga kale. Way wanagsantahay hadii xooxda ay fuliyeen howsha billawga illaa iyo dhamaadka ee mid ka mid ah isbedalada uu kooxada ay dooneyso in ay baraaan. Ayan ku han wayn yihiin hadii ay sooban dhigaan hal qorshe si guul ah, tani ayaa hami gali karto kooxda in ay sii wadadaan howlahooda.
11. Waydii kooxada in aysoo bandhigto sawirada ay qorsheeyeen ay kujiraan magacayda mus'uuhiyiinta ah ee talaabo kaste ee bulshada. Tani ayaa waxaay ka caawineysaa qofkaste oo kamid ah bulshada in ay kawarhaayaan wargalinsan wax dhacaya.

Hawsha 4aad: In la ogaado wixii qaladaad ah ee dhici kara

Agabka 4aad: Tusaha dhibaataada (*Problem Box*)



Ujeeddada (*Purpose*)

In la helo si kooxdu uga fekeraan dhibaatooyinka dhici kara marka qorshaha la fulinaayo iyo hababka lagaga bixi karo



Wagtiga (*Time*)

1 saacad



Alaabta (*Materials*)

Kaadhadh, qalimaan, meel wax lagu rido, (sida sellad, kolay.koofiyad)

Waxa la qabanaayo:

Hawshani waxa ay la mid tahay tii waqti siinta su'aalaha ee lagu soo qabtay intii aan ku jirnay talaabda 4aad waxaana asal ahaan loo samaynayaa si isku mid ah.

1. Haddii waqti kala go'ay sida nasasho oo kale u dhexeeyo hawshan iyo middii ka haraysay ku bilaw dood kooxda dhex marta oo ujeedadeedu ay tahay in dib loo eego waxyaalihii lagu soo bartay ama lagu go'aansaday kulamadii ka horeeyay
2. Hawsha ugu dhandhig sedan soo socota: "qof weliba idinkoo raali iga ah am ku qoraa waraaq yar dhibaatooyinka laga yaabo inay soo baxaan, u qor dhibaatada si suaal oo kale ah ama sawir ku muuji, tusaale ahaan, maxaynu samaynaynaa haddii qofkii loo tababaray inuu hawshaas hagaajinta qabtaa uu bulshadaba iskaga tago?" Si la mid ah tii sanduuqa su'aalaha, qofkii ka mid ah bulshada ee aan wax qorin ama akhrin waxa uu calaamadin karaa kaadhka,
3. Waydiiso mid ka mid ah kooxda inuu ku soo ururiyo kaadhka dhibaatooyinka lagu qoray hal sanduuq ama shay kale oo lagu soo guro, kaasi oo noqonaaya sanduuqa dhibaatada
4. Marka dhibaatooyinka oo dhan la soo ururiyo, u dhaaf in lawada hormariyo sanduuqa dhibaatada oo uu ka qaato mid kasta oo ka mid ah ka qaybgalayaashu hal kaadh ama waraaq oo uu ka jawaabo suaasha ku taalla. Haddii uu mid ka mid ahi qaato suaashii isaga ka timid waa loo bedeli karaa, haddi akhrisku ku adkaado mid ka mid ah ka qaybgalayaasha adigaa u akhriyi kara qokuna wuu ka jawaabi karaa su'aasha
5. Sii kooxda waqti badan oo ay kaga doodaan jawaabaha, haddii mid ka mid ah ka qaybgalayaashu aanuu ka jawaabi Karin suaasha qof kale oo kooxda ka mid ah ayaa ka jawaabi kara

TALAABADA 6AAD: Meelmarka iyo idho indhaynta horumarka *(Monitoring Implementation Progress)*

Talaabadani waxa ay u muuqataa hal hawl oo qudha. Hawshan waxa ay kooxdu buuxinayaan shax (eeg tusaalaha hoose) marka wax dabagal lagu samaynaayo sida hawshu ay u socoto (monitoring) waa hubin (checking) ama in lala socdo kolba talaabada horumarka la sameeyay ee taageerada ka gaysanaaya sidii loo gaadhi lahaa hadafkii guud ama yoolkii la higsanaayay. Habka ama dariiqada lagu ogaanayo ama lagu cabbiraayo hormarka la sameeyay waa mid la garanaayo, sida badan waxa ay tani u baahan tahay in la qabto iyo yaa ka masuul ahaa qabashadeeda.

Hawsha 1aad: Isu diyaaring si loo xaqiijiyo wixii horumar ah ee la sameeyay

waxa ay ka caawinaysaa kooxda in cid xi lama masuuliyad loo magacaabo hawl kasta iyo iyo talaabo kasta

Agabka 1aad: Qorshe hawleedka hubinta hawlaha

Fiiro gaar ah:

Hawshani waxa ay yeelan kartaa qoraallo fara badan, si kastaba ha ahaatee, haddii ay ka qayb galayaashaada ay ku adag tahay wax akhrinta iyo qoristu, waxaad u baahanaysaa inaad hesho dariiqadii aad hawshan ku qaban lahayd adiga oo isticmaalaaya sawirro iyo qoraallo yar inta ugu yare e suurogalka ah, tusaale ahaan,

- Halkii aad ku qori lahayd yoolka ama hadafka waraaqda shaxda, ka qaybgalayaashu waxa ay ku bedeli karaan sawir kaasi oo u taagan hawlaha ama adeegyada ay doonayaan in la qabto /la dhiso ee taageeraaya sidii yoolkaas loo gaadhi lahaa.
- Qoraal ahaan ku or tirada haddii ay dadku fahmayaan, isla markaa ayay ka qaybgalayaashu ku qori karaan tirada inta adeeg ee kooxdu doonayaan inay sameeyaan ama dhisaan iyada oo aan la sawirin adeegayadaas.
- Sawirrada iyo calaamadaha waxa loo adeegsan karaa in ay metelaan fikradaha iyo ereyada.
- Ka qaybgalayaasha ayaa dooran kara calaamdda nooca la isticmaalayo sida ubax, shimbir ama midab si uu u metelo iyaga iyaydo la gu qoraayo ama la dhigaayo meesha ay ku began ee hoose kolba cidda ka masuulka ah inuu hawshaas qabto ama xaqiijinaaya inay qabsoomeen.

Tusaale: Qorshe hawleedka hubinta hawlaha

Hadafka (sawir)	Tirada	Sida loo cabiraayo ama lagu ogaanaayo	Goorta la cabirayo	Yaa ka masuul ah

Hawsha 1aad: Isu diyaaring si loo xaqiijiyo wixii horumar ah ee la sameeyay

Agabka 1aad: Qorshe hawleedka hubinta hawlaha (*Monitoring Chart*)



Ujeeddada (*Purpose*)

In la sameeyo dariiqo loo maro ama hab loo raaco si loola socdo loona ogaado ama hubinta horumarka la sameeyay, si loo go'aansado kolba nooca hawsha hubinta ee ay tahay in la qabto iyo cidda ka masuulka ah hawshaas, iyo in loo cayimo maalinta ama waqtiga hawsha qiimaynta, taasi oo si balaadhan uga dhex dhacaysa bulshada oo dhan waqti cayiman oo mutaqbalka ah.



Wagtiga (*Time*)

2 saacadood



Alaabta (*Materials*)

Kaadhadh, qalimaan, kolba sidii loo heli karo meel ku haboon in lagu Sawiro: sawirada biyaha iyo nadaafadda guud, talaabooyinka adeegayda ah ee ay bulshadu qorsheeyeen si loo arko, (ee qorshe hawleedka bulshada) iyo sawirada nooc ahaanta lagu kala saar saaro ee la doortay (ee qorshe hawleedka bulshada).

Waxa la qabanaayo:

1. Hadda ka qayb galayaasha oo dhami waxa ah u shaqaynayaan koox ahaan, tus sawirada metelaaya hadayada ama yoolashooda
2. Hsaxadii dabagalku diyaar waa inay ahaatee (eeg tusaalaha sare)
3. Waydii dadkii la doortay ama xilalka xidhiidhdinta ee hawlo go'an loo dhiibay, (kuwaasi oo la doortay markii maxaa la qabanayaa iyo yaa qabanaaya qorshaheeda lagu jiray). Si aad u fududayso hawshan, adeegso kelimaadka soo socda: waxaan jeclaan lahaa in dadkii la doortay intii hawshii qorshaha maxaa la qabanayaa iyo yaa qabanaaya lagu jiray ay kooxda inta hawshan hadda ay inagu hogaamiyaan, waxaad ka caawin doontaa kooxdaa inay buuxiyaan inta ka dhiman shaxda ee hadda heerkan lagu buuxin karo, iyo inay isku raacaan sida ay u sii socon karto ee loo samayn karo hababkaas wax lagu hubinaayo mustaqbalka. Ku dheji sawirada metelaaya hadafyada aad leedahay dhinaca bidix ee waraaqda shaxda siina wad inaad buuxiso inta hadhay ee waraaqda"
4. Ka dib marka waraaqada shaxda la buuxiyo, waa inaad kooxda u fududaysaa inay ka doodaan:
 - Sida loo cabiraayo horumarka la sameeyay
 - Inta jeer ee cabiraadda horumarka la samaynaayo
 - Yaa ka masuul ah dabagalka cabiraadda horumarka la sameeyay
 - Side bay uga qayb qaadanayaan qaybaha kale ee bulshadu
 - Hubinta horumarka la sameeyay iyo gaadhitaanka yoolka guud ee mashruuca.
5. Waydii inay kooxdu u cayimaan maalin go'an oo qiimaynta mashruuca la samayn doono (talaabada 7aad)
6. Ku soo gabagabee kulanka xaflad iyo dabaaldeg, duco ama hawlo kale oo farxadeed oo loogu dabaaldegaayo guulaha kooxda.

TALAABADA 7AAD: Qiimaynta (Evaluation)

Tallaabadan waxaa la qaadayaa ka dib marka ay bulshadu fuliso qorshaheedii, ilaa 6 bilood ama 1 sanad ka dib marka laga soo bilaabo bilawgii hawsha mashruuca

Qiimaynta sida wada jirka looga wada qaybqaadanaayo waxaa ka qayb galaaya inta ugu badan ee suurtogalka ah oo dadka bulshada ah iyo dakad kale ee horumarka bulshada ka shaqeeya, madaxda iyo xataa dad ka yimi bulshooyinka kale ee jaarka ah. Talaabadani waa inay ahaato mid xiiso leh oo dabaal deg u ah guusha kooxda, inta qiimayntu ay socoto kooxdu waxa ay ogaan doonaan:

- Intee in le'eg ayaa laga qabtay bulshada dhexdeeda.
- Intee in le'eg ayaa qorshihii weli u baahan in la qabto.
- Maxaa si fiican u guulastay ama u dhacay.
- Wax ama talaabo sixid ah oo loo baahan yahay haddii ay jiraan.
- Miyee jiran wax saxita u bahan o dheerad ah.

Waxa la qabanaayo:

1. Sharaxaad ka bixi in qiimaynta lagu hirgelin karo dhowr siyaabood, tusaale ahaan:

- Kooxdu waxay iskood u hirgelin karaan hawlaha qiimaynta, dabadeed warbixintooda ula iman karaan bulshawaynta inteeda kale iyagoo qalabka sida sawirada sudhaya ama ka laalaadinaya meel dadkoo dhama kawada arki karaan
- Kooxdu waxay ka qaybgelin karaan bulshowaynta hawlaha qiimaynta; tusaale ahaan, waxa dadka laysugu yeedhi karaa hawl gal bulsho oo loogu codaynayo isticmaalka agabka fayadhowrka ee loo yaqaan hawlaha tuse jeebeedka.
- Ama kooxdu waxay mar wada qaban kartaa labadaa talaabo ee kor ku xusan, iyadoo umaraysa in samayso hawlo qiimayn u gooniya, islamarkaana hirgelinaya qiimayn bulshadu ka qaybqaadatay, sida soo bandhigid riwaayad googoos ah oo ku saabsan barnaamijkan oo loogu talo galo kooxo intan ka balaadhan.

2. Kooxdu waxay dabcan u baahan kartaa in ay isugu yimaadaan shirar gaara oo ay ku qorsheeyaan qiimaynta ama dhacdooyinka loogu talo galay mujtamaca.

3. Kooxda waxaad ka wada hadashaan:

- Waxaad kala shaqaysaa kooxda sidii ay ku qiimayn lahaday natiijooyinka ay gaadhay
- Waxaad kala shaqaysaa sidii ay uga qayb gelin lahaayeen dad badan oo ay bulshada kasoo naqeeyeen
- Waxaad kala shaqaysaa sidii ay hawlaha qiimaynta uga dhigi lahaayeen kuwo xiiso leh dadkoo dhamina kuwada qancaan

4. Sharaxaad ka bixi inay muhiim tahay inay kooxdu gaadho go'aanada waxay qabanayaan. Markaa halkii lagu hagi lahaa hawl kaamila ah, waxaa la siin karaa liis lagu soo jeedinayo qiimayno loo dhan yahay oo kala duwan.

5. Waxaad kooxda xasuusisaa khariidadahii iyo tuseyashii ay sameeyeen markii lagu guda jiray hawshii PHAST, waxaanad kooxda waydiisaa bal sida ay la tahay in loo isticmaali lahaa qalabkaas.

6. Haddii ay kooxda ku adkaato go'aan qaadasho hawlaha qiimayneed ee ay qabanayaan, waxaad u bilaabi kartaa wadahadalo iyadoo la adeegsanayo soo jeedimaha hoos ku xusan.

7. Adoo ka shiidaal qaadanaya nooca iyo tirada hawlaha qiimaynta ee la doortay, waxaad ku hagtaa kooxda sidii ay ku fulin lahayd qaybaha kala duwan. Wakhti ucayiman oo loogu talo galay in qiimaynta lagu hirgeliyo majiro.

8. Waxaad isku taxalujisaa sidii kooxda iyo xubnaha bulshada ee kale ay hawlaha qiimaynta uga dhigi lahaayeen mid firfircoon oo lagu raaxaysto xusuusna mudan.

9. Adoo adeeg sanaya natiijooyinka kala duwan ee hawlaha qiimaynta, waxad waydiisaa kooxda inay qoraal ku bixiyaan waxyaabihii ka soo baxay iyo sameeyaana soo jeedimo waxqabad oo mustaqbalka ah.



Fiiro-gaar ah:

1. Dooro mida kali ah kirada ee laga wada xaajooday mid aad u maleyneysid in ay tahaay mid ugu wacan kooxada. Tixraac heerlka ay wax u qoraan iyo aqrintoodana ay tahay, qeybahah kalduwan ee xirfada shaqsi ahaaneed ee xubnaha kooxada iyo waliba sida ay u wada shaqeeyaan kooxdooda
2. Isku day in aad dhiiro galisid kooxada in ay matalaan qaab riyaada bulsheed ah, hadii kooxada aysn rajeneyn isku day in kuwa kale ee fikradaha kale. Kuwa kale ee kamid ah bulshada ayna tahay mid aad u qosol badan in la diyaariyo.

Hawsha 1aad: Hubinta horumarka

Ikhtihaar 1aad: Shaxda dabagalka (hubinta) (*Monitoring (checking) chart*)



Ujeeddada (*Purpose*)

In la hubiyo in hadafkii la gaadhay iyo in kale



Waqtiga (*Time*)

2 saacadood



Alaabta (*Materials*)

Waraqada shaxda dabagalka ee lagu sameeyay talaabadii 6aad, hawsha 1aad, qalimaan, waraaqo.

Tilmaamo guud:

1. kooxdu ha eegaan shaxda hubinta ama dabagalka si ay dib u eegid ugu sameeyaan hadafkii la rabay, dabadeed waydii inay is barbar dhigaan hadafku waxa uu ahaa iyo waxa hadda la gaadhay ilaa intii shaxdan la sameeyay. Waxa laga yaabaa inay kooxdu doonaan in ay qoraan ama diiwaan geliyaan faraqa u dhexeeya wixii la qorsheeyay iyo waxa la gaadhay. Ku dhiirigeli kooxda inay isu eegidda labda u adegsadaan dariiqadii ay doonaan, isticmaalaan qalimaan, waraaqo, sawirro, ereyo iwm.
2. Marka is barbar dhigaas la sameeyo waydii kooxda inay ka doodaan:
 - maxaa si fiican u dhamaaday
 - wax dhibaato ah
3. Ka codso kooxda inay ku diiwaaniyaan (sawirro, qoraalo, ereyo) dhibaataada una kala saarsaaran:
 - Dhibaatooyinka bulshadu kelideed wax ka qaban karto
 - Dhibaatooyinka bulshadu kelideed aanay waxba ka qaban karin
 - Dhibaatooyinka aanay ka qaybgalayaashu fahamsanayn
4. Ku dheji 3da qaybood ee dhibaataada ah gidarka dabadeed waydii ka qaybgalayaasha inay go'ansadaan:
 - Dhibaataada ay wax ka qaban karaan: waxa ay ka qabanyaa ama sida/talaaba ay waxa kagaa qabanayaan
 - Dhibaatooyinka aany fahamsanayn: side bay warbixin dheeraad ah ugu heli karaan, goorma ayy qabanayaan taas, yaa ka masuul noqonaaya qabashadeeda
 - Dhibaatooyinka aanay xal u heli Karin: sidee bay taageero dibadeed ugu heli karaan si looga gudbo dhibaataadaas.

Ikhtiyaar 2aad: Khariiradda bulshada (Community map)




Ujeeddada (Purpose)

In la hubiyo haddii ay bulshadu samaysay wax horumar ah oo muuqanaaya



Wagtiga (Time)

2 saacadood



Alaabta (Materials)

Maabka ama khariiradda bulshada ee lagu sameeyay talaabada 3aad, hawsha 1aad, qalimaan, waraaqo, waraaqo midabo leh, waraaqaha waawayn si isbedel loogu sameeyo khariiradda bulshada, waxyaalaha maabka lagu sameeyo oo dheeraad ah, waxaa laga yaabaa inay bulshadu maab cusub samaystaan oo isbedelada muujinaaya

Tilmaamo guud:

1. Khariiradda bulshada waa in la eego laguna sameeyo isbedelada dhacay ilaa intii la sameeyay maabka ugu horeeyay. Ama haddii ay rabto sidaas oo waqtigu ogolaado waxa ay samaysan karaan maab cusub
2. Marka taas la qabto, waydii kooxda inay ka doodaan:
 - Is bedelada dhacay
 - Faraqa u dhexeeya wixii la qorsheeyay iyo waxyaalaha qabsoomay ama la gaadhy
3. Ku sii wad hawsha adigoo raacaaya tilmaamaha qodobka 2aad ee sii raacaaya talaabada 1aad

Ikhtiyaar 3aad: Qorshaynta waraaqaha waawayn iyo yaa qabanaaya maxaa (*Planning posters and who does what*)



Ujeeddada (*Purpose*)

Hubinta in hadafkii ama yoolkii la gaadhay



Wagtiga (*Time*)

2 saacadood



Alaabada (*Materials*)

Waraaqha qorshaha lagu sameeyo ee waawayn ee talaabda 5aad hawsha 3aad, qalimaan iyo waraaqo

Tilmaamo guud:

1. Ka codso kooxda inay eegaan waraaqaha qorshaha iyo qorshihii yaa qabanaaya iyo maxaa la qabanayaa is barbardhig wixii qorshaysnaa iyo waxii la gaadhay. Kooxdu waxa ay qoran karaan faraqyadaa jira. Ku dhiirgeli inay is barbar dhigaas u sameeyaan sdii ay doonaan, isticmaalaan qalimaan, waraaqo, sawirro, ereyo, ama calaamadeeyaan waraaqda qorshaha maxaa la qabanayaa yaase qabanaaya, iwm.
2. Kusii soco hawsha adigoo raacaya tilmaamaha min talaabada 2aad ilaa tan 1aad.

Ikhtiyaar 4aad: Kala saarista doorashada ah ee qarsoon (Pocket chart)



Ujeeddada (Purpose)

In lagu hubiyo in dhaqamadii nadaafadu isbedeleen



Wagtiga (Time)

Waxa ay tani ku xidhan tahay tirada dadka ee codbixinta samaynaysa



Alaabada (Materials)

Meesh codka lagu ridaayo, sawirada noocyada dhaqamada nadaafada ee la qaatay in waraaqda kala doorashada lagu qoro, waxyaalaha codka lagu bixinaayo oo ku filan dhamaan dadka ka qayb galaaya.

Tilmaamo guud:

1. Ka codso mid ka mid ah ka qaybgalayaasha oo yaqaana habkan doorashada qarsoon inuu fududeeyo hawshan
2. Samee waraaqda muujinaysa dhaqanada fayadhawrka ee la isla qaatay in la cabiro sharaxna waxa ay tahay iyo sida loo isticmaalay. Ku rid cod adiga qudhaadu si aad u tustid dadaka sida loo isticmaalo waraaqda codka ee qarsoon. Hubi inaad ka jarto una sharaxdo in ay taasi tusaale ahayd.
3. Ku meelee shaxda si aan qofku marka uu codaynaayo loo arki Karin, u sheeg dadka inay bilaabaan codaynta, waqtina ugu talagal
4. Marka qof kastaaba waqti ama fursad u helo inuu codeeyo, ka codso mid ka mid ah inuu tiriyo codadaka oo uu natiijadana sheego muujiyo, hubi intaasi u dhacdo iyadoo si buuxda loo wada arkaayo in ay si sax ah u dhacday
5. U fududee inay ka doodaan:
 - Maxay waraaqda codayntu inna tustay
 - Haddii ay natiijadu muujinayso horumar ama ka wanaagsanaan
 - Side baa natiijadan loo barbar dhigi karaa qorshihii kooxda
 - Sababaha ay dadku ugu codeeyeen sidaas
6. Doodaas ka bacdi, sii wad hawsha adigoo raacaya tilmaamaha min talaabada 2aad ilaa tan 1aad



Fiiro gaar ah:

In ka badan hal oo waraaq qarsoodu ugu codayn ayaa la samayn karaa. Tusaale ahaan ujeedooyinka ama habdhaqanka la soo baadhi karo ee lagu isticmaalayo dariiqadan waxaa ka mid ah meelaha ay dadku ku saxaroodaan, gacma maydhista, hawlaha ay qabtaan ragga iyo haweenku, meelaha biyaha laga dhaansaado.

Ikhtiyaar 5aad: Socodka bulshada (Community walk)



Ujeeddada (Purpose)

Waa in lagu eego bal sida xaaladaha bulshada ee guud ay ugu jeedaan sidii ay u arki lahaayeen haddii natiijadii ama yoolkii la gaadhay.



Waqtiga (Time)

Waxa ay tani ku xidhan tahay tirada dadka ee codbixinta samaynaysa



Alaabda (Materials)

(Waa wax is bedbedeli kara), qalimaan waraaqo, kamarad (haddii la heli karo).

Tilmaamaha guud:

1. Ka codso ka qayb galayaasha inay laba laba isu qaybiyaan, (haddii kooxuhu intaa ka bataan dareen badan bay soo jiidanayaan).
2. Una sheeg in laba qof oo kastaa ay ku soo dhex maraan oo iyagu ay ku sameeyaan socod u gooni ah bulshada dhexdeeda wixii ay arkaana ay soo qoraan. U sheeg inay waqtiga socodka ka dhigtaan marka ay ugu jecel yihiin iyagu inay arki karaan waxyaalaha xidhiidhka la leh biyaha iyo nadaafadda guud – inta badan subaxdii ama galabtii. Waana inay fiiro gaar ah siiyaan waxayaalahan: is bedelka muuqda ee la arki karo tusaale ahaan adeegyadii ay qorsheeyeen in lasameeyo
 - noocyada hab dhaqanada ah ee ay doonaayeen in la dhiirigeliyo
 - noocyada hab dhaqanada ah ee ay doonaayeen in la joojiyo
3. Ka codso laba qof oo kastaa inay u gudbiyaan warbixin ka siiyaan u sheegaan kooxda ama bulshada oo dhan natiijada waxa ay ku soo heleen ama ku soo ogaadeen socodkoodii. Natiijada waxaa loogu warbixin karaa dariiqo kasta oo ay doonaan sida hadal, sawirro tusid, jilid wixii ay soo arkeen, hees ahaan.
4. U fududee dood ku saabsan is barbar dhigga waxa la soo arkay iyo wixii u qorshysnaa bulshada
5. Ku sii wad hawsha sidaa adiga oo raacaaya tilmaamaha min talaabada 2aad ilaa tan 1aad.

Ikhtiyaar 6aad: Riwaayad bulsheed (Socio-drama)



Ujeeddada (Purpose)

In lagu wargeliyo bulshada guud ahaan horumarka la sameeyay ilaa hadda, iyadoo lagu caddaynaayo fursado loogu dabaal degaayo guusha mashruuca, laguna daraayo aragtida mashruuca ay ka qabaan dad ka yimid bulshooyinka kale, madaxda iyo deeq bixiyayaasha.



Waqtiga (Time)

1 – 2 saacadood diyaarinta iyo tijaabinta

Tilmaamaha guud:

1. Hawshan waxaa lagu qaban karaa si kooxo mid kiiba 4 – 8 qof ka kooban yahay ah, dadka martida ah ee lagu martiqaaday inay ka soo qayb galaan waxa ay ku biiri karaan koox kasta
2. Sii kooxaha hawlaha ay qabanayaan adigoo u sheegaaya: “wada shaqaynta, dooro hal qayb oo ka mid ah mashruuca kana sii sheeko yar oo ilaa 10 daqiiqo ka badnayn oo ku saabsan, koox waliba waxa ay sheegi doonaan qaybo kala duwan oo sheekada ka mid ah, waxaad tan u samayn kartaa si kasta oo aad jeceshahay. Hadba sida aad u aragto in aad u baahan tahay inaad ugu soo gudbiso si madadaalo ama qosol leh, hab kast oo aad adeegsanayso sida aad sheekada u soogudbinaysaa waa inay 10 daqiiqo ka badan. Waxaad u baahan tahay 30 daqiiqo inaad ku diyaariso kuna tijaabiso hawshaad. Hubi in koox kasta oo ka mid ah kooxaha yaryari ay sheegayso qayb kale oo sheekada ka mid ah.
3. Marka ay kooxuhu diyaar garoobaan ka codso inay sameeyaan riwaayad-bulsheedkooda
4. Ka dib marka riwaayad-bulsheedka la bandhigo, ka qayb galayaashu waxa ay dooni karaan inay ka doodaan waxii kale ee macno ama muhiimad gaar ahaaneed leh ee aan la metelin ama ku jirin.



Fiiro gaar ah

1. Koox kastaa ha samaysato riwaayad-bulsheedkooda sida ay doonaan adiga oo aan waxba ku darsan.
2. Kooxuhu waxa adeegsan doonaan hab kala duduwan oo ay sheekooyinkooda ku sheegaan sida muusik, ciyaar, jilid ama metelaad, ka qoslin.
3. Hawshan waxaa loogu talagalay inay ahaato mid xiisa badan yeelan karta iyo inay samayso hab la jeclaysan karo oo loo soo koobo wixii ay kooxdu ka

soo barten ama waaya aragnimadoodii intii mashruucu socday. Hab kale oo lagu bedelan karo, hab wadajir ah oo wax badan isugu jira ee hawshan waxaad ka codsan kartaa kooxda inay doortaan 8 – 15 qof oo ka mid ah si ay u sameeyaan show ama bandgig sida tiyaatarada loogu soo bandhigaayo iyadoo ku salaysan horumarka mashruucu sameeyay. Tani waxaa la qaban karaa malin ama laba casho ka hor xafaladda dabaaldegga ee xidhitaanka qiimayntii mashruuca. Markaa kolba sida loogu baahan yahay ayaad waqtiga u siinaysaa ka qaybgalayaasha si ay u soo diyaariyaan sida hawsha u qabanayaan.

4. Waqtiga lagu qaadanaayo dabaaldega guusha waa wax aad u muhiim ah, natiijada wanaagsani waxa ay kordhinaysaa kalsoonida iyo niyadda kooxda dhexdooda waxaanay ku dhiirigelinaysaa inay sii wadaan shaqada si ay isbedel u sameeyaan. Ka doodista dhibaatooyinkuna wax ay yeelan kartaa raad ama natiijo la mid ah, waayo waxa ay muujinaysaa in haddii kuwaas la xalliyo ay ka timi awoodda kooxda
5. Kooxdu waxa ay hadda leedahay xirfad wax qabad iyo madax banaani si ay u sii wadaan kelidood hawlaha isku xig xiga ee lagu baranaayo talaabooyinka horumarka ah ee u qorshaysan in lagula dagaallamo xanuunada shubanka. Waxaa kale oo wanaagsan xirfadihii lagu bartay intii barnaamijkani uu socday in lagu isticmaali doono xalinta dhibaatooyinka kale ee bulshada. Marka laga eego dhinaca waqtiga fog, tani waxa ay ku hogaaminaysaa in ay gaadhaan nolol aad ay tayadeedu u sarayso oo hagaasan dhamaan ciddii ay khusayso

Gaba gabada

Maxaa laga yaabaa inaad heshay ama aad ogaatay

Waxaad la kulmi doontaa “guulo” heerkoodu aad u kala duwan yahay, bulshooyinka qaarkood ayaa kara inay hore u sii wadaan qorshaha kuwa kalana ay ku sii fidiyaan waqti horeba. Laakiin cadayn kastaa oo horumar la sameeyay waxa ay aasaas adag siinaysaa kaasi oo ay bulshadu dhisi karaan. Si kastaba ha ahaatee, dadku waxa ay u baahan yihiin inay arkaan natiijadii dedaalkooda iyo wax qabadkooda, haddi taa la waayona waxaa la waayayaa labadaba niyaddii ama dacadnimadii iyo wixii ay barteen iyo laftoodaba. Doorkaaga fududeeye ahaaneed, waxa aad ka caawin kartaa qaabkaasi in aanuu dhicin adigoo ku helaaya in kooxdu ay gartaan aqoonsadaan guulaha ay gaadheen, macno malaha haddii ay sidaa u sii yar yihiin. Haddii ay lagama maarmaan noqotana waxaad isticmaali kartaa hawlaha aad sida aadka u taqaanid ee kuu fudud si aad hawlaha iyo dariiqooyinka dib ugu bilawdo mar kale. Taa samaynteeda waxaad ka caawin kartaa kooxda inay gartaan

dhibaatooyinka keenay ama sababay in intii la qorsheeyay in ka yar la gaadho, daraasadee oo lafagur ku samee kuwaasi, qorshe u samee sidii xal loogu heli lahaa, kala dooro ahmiyadda talaabooyinka ay tahay in la qaado ama la qaadi karo, samayso qorshe cusub, hawlaha u kala magacaw cidda ka masuulka noqonaysa ama qabanaysa, dabagal iyo hubin joogto ah inta hawshu socoto iyo qiimayn aad ku samayso natiijadeeda ka soo baxday.

Saxidda barnaamijka

Hababka iyo dariiqooyinka hawsha lagu hubinaayo ama lagu daba gelaayo isla markaa lagu qiimaynayaa waa mid joogto ama xidhiidh ah, waaxaanay siinaysaa jawaabcelin ama natiijo ka soo baxaysa kooxda, oo awood u siinaysa inay bartaan wixii khaladaad ahaa, iyadoo ku salaysan warbixintan kooxdu waa ay bedeli karaan ama wax bay ka bedeli karaan qorshayaashoodii si ay uga hortagaan ama uga taxadaraan dhibaatooyinka. sidaa darteed waxa ay ku shaqaynayaan oo keeni karaan natiijo ka guulo badan.

Lifaaqqa: Shubanka iyo xanuunada kale ee nadaafadda guud la xidhiidha

Maxaa uu shubanku khatar u yahay?

Shubanku waxa uu keenaa in dheecaano badani ay jidhkaaga ka baxaan kaasi oo keeni kara fuuqbaxid iyo xataah dhimasho. Wuxuu dhaliil u yahay xanuunadha oo saameeya caloosha iyo madhiciradha. Shubaanku waa noocya kala dhuwan ayathoo ay ku saleeysantahay waxyaabaha ee sabab uh ah. Bil mathal, waxaa jira daacuunka iyo diisentiriyaha.

Waa dallil oo infecshaneedh oo ay sababeen bacteeriya oo kala dhuwan. Bacteeriyooyinka waxa ay noaqon karan noocya kale oo la yiraahtho Viruska ama se paarasaytka oo shubanka keeni kara. Waxa marka sii fidhinaaya biyo qurun ah iyo nadhaafadh dharo. Waxa ay aadh iyo aadh u badhan tahay xaaladhasi marko biyo yaraan ay jirto oo biyaha loo isticmaalayo cabista, cunta kariska iyo nadhiifinta ay aadh u yarataan. Nadhafaadha waa arin aadh iyo aadh u muhiim ah xaga ka hortaga cudhuradhaan.

Shubaanku muxuu khatar u yahay?

Shubanku waxaa kale oo uu keeni karaa nafaqa darro ama inay ka sii xumaato waayo:

- Wixii nafaqa ahaa ee jidhka ku jiray ayaa ka baxa.
- Cuntada ayaa si dhakhso ah u dhaafta habdhiska dheefshiidka sidaa darteed waxyaalihii nafaqada ahaa jidhku kama nuugu karo sidii marka ay caadiga yihiin oo kale.
- Nafaqadu koriinka oo kali ah ma caawiso laakiin waxa kale oo ay kabtaa ama dib u habayn ku samaysaa tissueyada dhaawacmay.
- Waxa ay ku keentaa qofka shubanku hayo in aanuu dareemin wax gaajo ah.

- Shubanka inta badan ku dhacaa waxa uu keenayaa in aan qofkii sooba ladnaan ama jidhkii si fiican uga soo raynin.
- Xanuunku wuxuu sii kordhinayaa baahida loo qabo waxyaalaha nafaqada ah.

Shubanka waxaa loo aqoonasan karaa saxarada biyaha ah ee qofka ka timaada 3 jeer wax ka badan maalintii, waxaa mararka qaarkood la socda dhiig taasi oo keeni karaysa dhimasho haddii aan si fiican loo dawaynin. Caruurta yaryar iyo kuwa aan weli socodka baranin ayaa aad ugu nugul xanuunkan waayo habka jidhku cudurada iskaga difaaco ee ay leeyihiin ayaan weli si fiican u horumarin ama yar.

Calaamadaha lagu garto iyo siyaalaha looga hortagi karo xanuunada badanaaba keena shubanka

Xundhurta: Waa mid ka mid ah shubanka dhiigga leh oo la isugu gudbiyo dariiqada saxarada oo afka gaadha, marka dadka uu ku dhaco waxa ay saxaroodaan tiro aad u badan oo noolayaasha ilima aragtayga ah ee xanuunka keena ah oo saxarada fofka xanuunka qaba la socda. Haddii markaa xanuunsida yaasha saxarada ku jiraa ay gaadhaan cuntada, biyaha ama gacmaha dadka kale way liqi karaan waxaanay qaadayaan xanuunkii

Daacuunka: Calaamdahiisu inat badan way fuduyihiin laakiin xaaladaha mar mar iyo dhif ayaa waxaa jira shuban biya ah isla markaa degdeg ah oo aad u daran iyo matag xanuun la socdo mararka qaarkood

Tayfoodhka: Calaamdahiisu waa saxaro jilicsan iyo xumad sii kardhaysa marba marka ka dambeeya waxaana inta badan la socda garaaca wadnaha oo hoos u dhaca. Dadka qaba xanuunka tayfoodhku waxa ay dareemaan bukaan ama xanuun aad ah oo xummad guud ahaan jidhka oo dhan leh iyo doonista cuntada oo ka lunta haddii aan la daawaynin

Siyaabaha looga hor tago cudurada aynu kor ku soo sheegnay ee keena shubanku waa sidan

- Gacmaha oo la maydho marka la saxaroodo, ilmaha loo maydho/qubayeeyo iyo marka saxaro la taabato.
- Gacmaha oo la maydho ka hor intaan cuntada la cunin, la karin ama aan ilmaha wax la siin.
- Saxarada oo la iska hagaajiyo iyadoo musqul la isticmaalaayo ama la aaso.
- In la helo biyo nadiif ah oo la cabi karo.
- Dadka oo lagu wacyi galiyo siyaabaha cuduradan looga hor tagi karo.

Calaamadaha guud ee fuuq baxa

- Indhaha oo gota
- Afka oo engega

- Kaadida oo yaraata ama aad u madoobaata
- Faraha dhexdooda oo dildilaaca ka dib shubanka

Sida loo daaweeyo shubanka

- Sii cabitaan fara badan
- Sii milanka milixda iyo sonkorta isugu jira ee shubanka ORS
- Si joogto ah u sii naaska habeen iyo maalinba kolba sida loogu baahdo
- Haddii uu soo yara ladnaaday ama qaadan karaayo sii cuntooyin jilicsan si in yar inyar
- Marka uu soo ladnaanaayo cuntada sii shan (5) goor maalintii
- Qoofka haduu darsado ama dhal haduu kamuqdo Daktarka la soodh sii

Milanka milixda iyo sonkorta shubanka (ORS) ee guriga lagu sameeyo

Kari hal litir oo biyo ah, dabadeed qabooji ku dar 8 malqacadood oo sonkor ah iyo hal malqacad buuxda oo milix ah. Iskuwada mil si fiican kuna sii ilmaha malqacad adigoo waxyaalo yar yar oo cunto ahna u raacinaaya, waa inaad hubisaa inta jeer ee kolba uu shubmaayo.

Laga soo bilaabo 1995, Hay'adaha Caritas Switzerland and Caritas Luxembourg waxay si wadajir ah ugu wada shaqaynayaan magaca SwissGroup kuna hawlanaa dib udhiska ama dhismaha illaha biyaha laga helo oo cusub ee kuyaala dhulka miyiga ah ee Somaliland.

Iyadoo ka mid ah hormoodka hay'adaha biyaha qaabilsan, waxay dib udhis ama dhisme cusub ku sameeyeen in ka badan 400 oo berkadood, boqol ceel ku dhowaad, dhowr balli iyo balli dixeedyo, iyo weliba taangiyada majaroorku waraabiyo oo loogu talo galay iskuulada.

Buugga sida talaabo talaabada ah lagaga barto hawlaha loo dhanyahay ee ku saabsan isbedelada nadaafada iyo fayodhawrka ee marka lasoo gaabiyo loo yaqaan PHAST waa mid ay ku ururtay khibrad laga helay mudo ka badan 10 sanadood oo lala shaqaynayay dadka dega miyiga iyo tuulooyinka, iskaashina lagala samaynayay dowladaha hoose, hay'adaha caalamiga ah iyo kuwa wadaniga ah si loo kordhiyo ku baraarujinta dadweynaha ee xagga muhiimada ay leedahay isticmaalka biyo nadiif ah iyo habdhaqanada nadaafada ee wanaagsan sida isticmaalka suuliyada, gacmo maydhista iyo maaraynta hawlaha iska fogaynta qashinka.